Ahmed Jama Abdulle

15-12-2011


**FAAFINTA** **RASMIGA**

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 13-aad. Garowe 06 December, 2011** **Lam.12**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.


---

## TUSMADA


**Qaybta Koowaad**

**Wax ka bedelka Xeerka Kalluumeysiga Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**


***Sharci Lr 8 ee 06/12/2011, kuna saabsan wax ka bedelka Xeerka Kalluumeysiga Dawladda Puntland***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

Madaxweynaha Dawladda Puntland

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.12 ee December 06, 2011, kuna saabsan wax ka bedelka Xeerka Kalluumeysiga Puntland.**

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/128/2011 ee 29/11/2011;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen wax ka bedelka Kalluumeysiga Dawladda Puntland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA

GOLAHA WAKIILLADA

Xafiiska Guddoomiyaha

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

HOUSE OF REPRESENTATIVES

Office of the Speaker

*Ref:*- XGGW/DPL / 128 /2011 Garoowe, Talaada Date:- 29/11/2011

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Wax ka bedelka Xeerka Kalluumaysiga Dawladda Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY;- | Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad. |
| MARKUU ARKAY;- | Soo gudbinta Madaxweynaha MW/DPS/1255/2011 ee 29/10/2011 kuna saabsan wax bedelka xeerka kalluumaysiga Dawladda Puntland Lr, 6 ee 18/04/1999. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan. |
| MARKUU DHAGEYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada |

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Wax ka bedelka Xeerka Kalluumaysiga Dawladda Puntland

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi


Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

| DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA | | PUNTLAND STATE OF SOMALIA |
|---|---|---|

Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda

(Kordhin Xeer)
Xeer Lam. 8 ee 18/04/1999,
kuna saabsan
XEERKA GUUD EE KALLUUMEYSIGA PUNTLAND
Puntland Generral Fishery Regulation
(Additional)




Garoowe

## Tusmada:


**1.0.0. Qaybta Iaad: Gogol-xaar.**

**1.1.0. Cutubka 1aad: Qeexid & Erey bixin.**
1.1.1. Qod. 1aad: Qeexid.
1.1.2. Qod. 2aad: Erey bixin.

**2.0.0. Qaybta IIaad: Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha.**

**2.1.0. Cutubka 1aad: Shati-siinta Gaadiidka Kalluumeysiga.**
2.1.1. Qod. 3aad: Ruqsada loo baahan yahay.
2.1.2. Qod. 4aad: La xiriirka wakiilka diblomaasiga ah.
2.1.3. Qod. 5aad: Codsiga Shatiga/ruqsada.
2.1.4. Qod. 6aad: Bixinta Shatiga/ruqsada.
2.1.5. Qod. 7aad: Qorshaha Kalluumeysiga.
2.1.6. Qod. 8aad: Wakiilka gudaha.
2.1.7. Qod. 9aad: Khidmadaha iyo dallacaado kale.
2.1.8. Qod.10aad: Shuruudaha shati bixinta.
2.1.9. Qod.11aad: Dib u habaynta shatiga/ruqsada.
2.1.10. Qod.12aad: Bedelidda shatiga/ruqsada.
2.1.11. Qod.13aad: Shatiga/ruqsada aan la wareejin Karin.
2.1.12. Qod.14aad: Shatiga/ruqsada lagu haynayo markabka dushiisa.
2.1.13. Qod.15aad: Hubinta shatiga/ruqsada.
2.1.14. Qod.16aad: Hakinta ama burinta ruqsada.
2.1.15. Qod.17aad: Rafcaan qaadasho.

**2.2.0. Cutubka 2aad: Habka ilaalinta Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha.**
2.2.1. Qod.18aad: Ka kalluumeysiga soohdinta baddeed waa mamnuuc.
2.2.2. Qod.19aad: Meel dhigida qalabka kalluumeysiga.
2.2.3. Qod.20aad: Kala wareejinta shixnadda.
2.2.4. Qod.21aad: Wargelinta soo gelida soohdinta.
2.2.5. Qod.22aad: Hubin dekedeed.
2.2.6. Qod.23aad: Hubin intaan laga bixin soohdinta.
2.2.7. Qod.24aad: Ka cafin hubin dekedeed.
2.2.8. Qod.25aad: Deked soo gelid.
2.2.9. Qod.26aad: Calamadda.
2.2.10. Qod.27aad: Calaamadaha.
2.2.11. Qod.28aad: Nalalka bad-mareenimada iyo qalabkooda is afgarasho.
2.2.12. Qod.29aad: Isgaarsiin.
2.2.13. Qod.30aad: U-hogaansanaanta ammarada.
2.2.14. Qod.31aad: Diiwaangalin iyo xafidaad.
2.2.15. Qod.32aad: Warbixinta.

2.2.16. Qod.33aad: Wargelinta dhamaytirka qoondeyntii lagu heshiiyey.
2.2.17. Qod.34aad: Ka fogaanshaha qalabka kalluumeysiga ee markab kale.
2.2.18. Qod.35aad: Wasakhaynta deegaanka iyo qalab kalluumeysi la dayacay.
2.2.19. Qod.36aad: Bad-mareenimada iyo hab dhaqankeeda.

**2.3.0. Cutubka 3aad: Cilmi-baarista kalluumeysiga Badda.**
2.3.1. Qod.37aad: Baaris cilmi ah.
2.3.2. Qod.38aad: Xaqa hakinta ogolaanshaha.
2.3.3. Qod.39aad: Codsiga cilmibaaris la xiriirta kalluumeysiga.
2.3.4. Qod.40aad: Shuruudaha.
2.3.5. Qod.41aad: Bixinta warqada ogolaanshaha.
2.3.6. Qod.42aad: Hakin/joojin cilmi baaris.

**2.4.0. Cutubka 4aad: Qoddobo kala duwan.**
2.4.1. Qod.43aad: Awooda saraakiisha idman.
2.4.2. Qod.44aad: Goob-joogayaal.
2.4.3. Qod.45aad: Nabadgelyadda.
2.4.4. Qod.46aad: Ganaaxyadda.
2.4.5. Qod.47aad: U qaadasho.

**3.0.0. Qaybta IIIaad: Gaadiidka Kalluumeysiga Wadaniga ah.**

**3.1.0. Cutubka 1aad: Shati-siinta.**
3.1.1. Qod.48aad: Ruqsada loo baahan yahay.
3.1.2. Qod.49aad: Codsiga ruqsada.
3.1.3. Qod.50aad; Bedelidda ruqsada.
3.1.4. Qod.51aad: Ruqsada lama wareejin karo.
3.1.5. Qod.52aad: Hakinta ama burinta ruqsada.
3.1.6. Qod.53aad: Khidmadaha.

**3.2.0. Cutubka 2aad: Diiwaangelinta Gaadiidka Kalluumeysiga.**
3.2.1. Qod.54aad: Diiwaangelinta.
3.2.2. Qod.55aad: Lambar-siinta gaadiidka diiwaangashan.

**4.0.0. Qaybta IVaad: Ruqsada & ogolaanshaha kale.**

**4.1.0. Cutubka 1aad: Beerista kalluunka.**
4.1.1. Qod.56aad: Ogolaanshaha beerista kalluunka.
4.1.2. Qod.57aad: Shuruudaha beerista kalluunka.
4.1.3. Qod.58aad: Ilaalinta kaabayaasha beerista kalluunka.
4.1.4. Qod.59aad: Hakinta & xirista kaabayaasha kalluun beerista.

**4.2.0. Cutubka 2aad: Kalluumeystaha & Ka-ganacsadaha kalluunka.**

| | | |
|---|---|---|
| 4.2.1. | Qod.60aad: | Aqoonsiga kalluumeystaha. |
| 4.2.2. | Qod.61aad: | Shatiga gurashada lohodka. |
| 4.2.3. | Qod.62aad: | Shatiga kalluumeystaha fanniga ah. |
| 4.2.4. | Qod.63aad: | Shatiga farsamaynta kalluunka. |
| 4.2.5. | Qod.64aad: | Shatiga ka-ganacsiga kalluunka ee gudaha dalka. |
| 4.2.6. | Qod.65aad: | Shatiga gurashada & ka-ganacsiga bahda aaragostada. |
| 4.2.7. | Qod.66aad: | Shatiga gurashada & ka-ganacsiga bacoolaha. |
| 4.2.8. | Qod.67aad: | Ogolaanshaha dhoofinta & soo dejinta kalluunka. |
| 4.2.9. | Qod.68aad: | Shatiga gurashada & ka-ganacsiga Qajaar-baddeedka. |
| **5.0.0.** | **Qaybta Vaad:** | **Arrimaha la adkeeyey ama la mamnuucay.** |
| **5.1.0.** | **Cutubka 1aad:** | **Arrimaha la adkeeyey.** |
| 5.1.1. | Qod.69aad. | Nadaafadda kalluunka. |
| 5.1.2. | Qod.70aad: | Hawlgalada gaadiidka aan wanaagsanayn. |
| 5.1.3. | Qod.71aad: | Goobaha tarmida/kobcinta iyo xilliyada. |
| 5.1.4. | Qod.72aad: | Samaynta & keenista qalabka & gaadiidka kalluumeysiga. |
| 5.1.5. | Qod.73aad: | Callaamadaynta shabaagaha & qalabka kalluumeysiga. |
| **5.2.0.** | **Cutubka 2aad:** | **Arrimaha la mamnuucay.** |
| 5.2.1. | Qod.74aad: | Xirfadaha Kalluumeysiga mamnuuca ah. |
| 5.2.2. | Qod.75aad: | Ugaarsiga naasleyda badda & qubadda. |
| 5.2.3. | Qod.76aad: | Wasakhaynta biyaha kalluumeysiga. |
| 5.2.4. | Qod.77aad: | Burburinta Qolof-qareedda Badda. |
| 5.2.5. | Qod.78aad: | Waxyeelida dhirta ka baxda xeebta. |
| **6.0.0.** | **Qaybta VI** | **Suuqa Kalluunka.** |
| **6.1.0.** | **Cutubka 1aad:** | **Dhismaha Suuqa.** |
| 6.1.1. | Qod.79aad: | Ogolaanshaha. |
| 6.1.2. | Qod.80aad: | Callaamadaynta & naqshadaynta suuqa. |
| **6.2.0.** | **Cutubka 2aad:** | **Nidaamka suuqa.** |
| 6.2.1. | Qod.81aad: | Tayada kalluunka suuqa. |
| 6.2.2. | Qod.82aad: | Mamnuucida kalluunka aan cunida u qalmin. |
| **7.0.0.** | **Qaybta VII** | **Habka la socodka gaadiidka kalluumeysiga.** |
| **7.1.0.** | **Cutubka 1aad:** | **Dejinta nidaamka la socodka.** |
| 7.1.1. | Qod.83aad: | Mas'uuliyada la socodka. |
| **7.2.0.** | **Cutubka 2aad:** | **Qalabka.** |
| 7.2.1. | Qod.84aad: | Qalabka isgaarsiinta. |

| | | |
|---|---|---|
| **8.0.0.** | **Qaybta VIII** | **Shaqaalaha Kalluumeysiga.** |
| **8.1.0.** | **Cutubka 1aad:** | **Kalluumeysatada Wadaniga ah.** |
| 8.1.1. | Qod.85aad: | Ka hawlgelinta Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha. |
| **8.2.0.** | **Cutubka 2aad:** | **Kalluumeysatada Shisheeyaha ah.** |
| 8.2.1. | Qod.86aad: | Ka shaqaynta gudaha dalka. |
| **9.0.0.** | **Qaybta IX** | **Maamulka Guud.** |
| **9.1.0.** | **Cutubka 1aad:** | **Xad-gudubyada.** |
| 9.1.1. | Qod.87aad: | Xadgudubka Gaadiidka Kalluumeysiga. |
| 9.1.2. | Qod.88aad: | Xadgudubka Kalluumeystaha. |
| **9.2.0.** | **Cutubka 2aad:** | **Awoodaha maamul.** |
| 9.2.1. | Qod.89aad: | Xeer hoosaadyada. |
| 9.2.2. | Qod.90aad: | Wakiilashada Saraakiisha Kalluumeysiga. |
| 9.2.3. | Qod.91aad: | Baaritaanada |
| 9.2.4. | Qod.92aad | Xal u helida cabashada. |
| 9.2.5. | Qod.93aad: | Tirtirid/Laalid |
| 9.2.6. | Qod.94aad: | Dhaqangalka xeerkan. |

# QAYBTA Iaad

## Cutubka 1aad
## Gogol-xaar

### Qod. 1aad
### Qeexid

1. Xeerkan waxaa loo macnaynayaa inuu yahay Xeerka Guud ee Kalluumeysiga Puntland, kaasoo bedelay Xeerkii Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha Lam. 06 ee 18/04/2011 oo kordhin lagu sameeyey (Additional).

2. Xeerkan waa nidaam-maamuleedka loo hirgelinayo Sharciga Kalluumeysiga Puntland, kaasoo laga soo tixraacay ama min-guuriyey Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed No. 23 ee 3 Nofembar 1985tii.

## Qod. 2aad
## Erey bixin

Ujeedada ereyada xeerkani waa sida soo socota, haddii nuxurka aan si kale loogu baahan;

1. **Wasiir:**Waxaa loola jeedaa Wasiirka Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda.
2. **Wasaarad:**Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda.
3. **Noolaha Biyaha ku nool:**waxaa loola jeedaa dhirta iyo noolaha kale ee ku nool biyaha marka laga reebo shimbiraha. Noolahaas waxaa ka mid ah kalluunka, qolofleyda, shacaabiga, xamaaratada biyo ku noolka ah, naasleyda badda, qolofta iyo ukunta iyo dhammaan wixii kale ee noole biyo ah.
4. **Biyaha Dhulka Dawlada Puntland:** waxaa loola jeedaa aagga biyaha ilaa 12 mayl marka xeebta laga soo bilaabo, qiyaastaas waxay la xiriirtaa heshiiska caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee sharciga badaha ku tilmaaman, kaasoo soo baxay 10/Dec/1982.
5. **Biyaha Durugsan:** waxaa weeye biyaha ka baxsan goobaha baddeed ee dhaqaale ahaan u khaaska ah dawladda Puntland.
6. **Aagga khaaska ah ee dhaqaalaha:** waxaa loola jeedaa aagga biyaha dhaafsan, kuna qabsan dhulbiyeedka Dawlada Puntland, aaggaas oo ah ilaa 200 mayl marka laga qiyaas qaato xeebta, kaasoo ku jaango'an heshiiska Qaramada Midoobay ee sharciga Badaha adduunka.
7. **Kalluumeysi:** waxaa loola jeedaa habka iyo tabta qabashada, la soo bixida iyo dilista kalluunka ama noole biyoodka kale.
8. **Ruqsada kalluumeysiga:** waxaa loola jeedaa ogolaanshaha la siiyo cidii soo codsata kalluumeysi, habaynta kalluunka, ganacsiga kalluunka iyo cilmi baarista kheyraadka badda Pl.
9. **Gaadiid kalluumeysi:**waxaa loola jeedaa Doon-yar, Doon-weyn, Markab iyo Daabad kasta oo loo isticmaalo kalluumeysi.
10. **Bixinta Ruqsada:** waxaa loola jeedaa habka lagu siiyo soo dalbadaha qoraalka sharciga ah ee fasaxa kalluumeysiga.
11. **kormeere:** waxaa loola jeedaa mas'uulka loo cayimay inuu fuliyo hawlaha kormeerka iyo xaqiijinta.
12. **Mulkiile;** waxaa loola jeedaa hantiilaha, kireystaha ama kasii kireystaha gaadiid kalluumeysi ruqsad la siiyey.
13. **Noocyada Kheyraadka la ilaaliyo:** waxaa loola jeedaa naasleyda badda, noolaha dabargo'ista khatarta ugu jira iyo noole kasta oo biyaha ku nool, kuwaasoo la mamnuucay in la kalluumeysto.
14. **Nooca kalluunka la abaarayo:** waxaa loola jeedaa nooca kalluunka ee ruqsada loo bixiyey qabsashadiisa.
15. **Buugga/Diiwaanka warbixinta gaadiidka:** waxaa loola jeedaa buugga ama diiwaanada doon ama markab kasta oo kalluumeysi looga baahan yahay inuu ku diyaariyo warbixin maamulka & hawl maalmeedkiisa kalluumeysi (log books).
16. **Calanka Wadanka:** waxaa loola jeedaa caddayn wadanka uu gaadiidka kalluumeysi ka diiwaan gashan yahay, si waafaqsan sharciga adduunka.

17. **Gaadiidka kalluumeysi ajanabiga ah;** waxaa loola jeedaa gaadiid kasta o loo isticmaalo kalluumeysi, kaasoo loo hawlgeliyey dan dhaqaale ama dan kale sida cilmi barista, habaynta kalluunka, keydinta kalluunka, iyo kuwa kalluunka qaada ama waxyaalaha kalluunka qaada, kaasoo laga leeyahay dal kale.
18. **Jillaabashada:** waxaa loola jeedaa ku qabashada kalluunka qalab sida jilib, maqaalin, shabaag iyo jirriif.
19. **Jillaabasho Dheeraad ah:** Waxaa loola jeedaa nooc walba oo kalluun ama noole biyood la soo qabtay oo aan ahayn kii bar-tilmaameedka ahaa, loona jillaabay si kama ah.
20. **Qabsashada aan loo qasdiyin:** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo noole biyood la qabto iyadoo la raadinayo nooc kale ee ruqsada lagu bixiyey.
21. **Goobta wax soo saarka lagu soo dejiyo:** waxaa loola jeedaa goobta xeebta ee la keeno wax soo saarka dhabta ah ee badda lagala soo baxo.
22. **Kalluunka laguu ogol yahay:** waxaa loola jeedaa kalluunka Ruqsada lagu bixiyey gurashadiisa.
23. **Meel ku xafidid:** waxaa loola jeedaa xafidaada qalabka kalluumeysiga oo lagu xafido sagxada hoose ee gaadiidka kalluumeysiga ama laga qaado oo laga fogeeyo meeshii la dhigi jirey marka la kalluumeysanayo.
24. **Calaamadda wicidda:** Waxaa loola jeedaa baaqyada ama dhawaaqyadda ay bixiyaan raadiyeyaasha gaadiidka badda
25. **Wakiil Diblomaasi ah:** Waa wakiil masila wadan ama qof loo aqoonsan yahay inuu wakiil gaar ah ka yahay Urur dawladeed oo marti ah.
26. **Hubin Dekedeed:** Waxaa loola jeedaa Deked ama marso ku taal xeebaha Puntland, taasoo ay gaadiidka kalluumeysigu iska xaadiriyaan, si loo baaro ama hubiyo shixnada saran marka uu Gaadiidka kalluumeysi soo gelayo ama baxayo.
27. **Hay'adaha Cilmi baarista PL:** waxa weeye hay'adaha Pl u qaabilsan cilmi baarista, loona xilsaaray inay bixiyaan warqada ogolaanshaha ee dhinaca cilmi baarida.
28. **Naakhuude:** Waxaa loola jeedaa qofka ugu sareeya ama mas'uulka ka ah Gaadiidka Kalluumeysiga ah.
29. **Wasakheeye:** Wuxuu noqonayaa wax kasta oo deegaanka badda u keenaya waxyeelo ku timaada noolaha badda iyo kalluumeysatada.

## Qaybta llaad
## Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha

### Cutubka 1aad
### Shati siinta Gaaddiidka Kalluumeysiga shisheeyaha.

#### Qod. 3aad
#### Ruqsada loo baahan yahay

Ma jiro Gaadiid ajnabi ah oo ka hawlgeli kara ama isku dayi kara inuu ka kalluumeysto baddaha Puntland ama ka qayb gali kara howlo ku saabsan jilaabasho, isagoo aan marka hore haysan warqad ruqso ama shati ah, iyadoo la tixraacayo Qod.15aad ee sharciga kalluumeysiga Puntland.

#### Qod.4aad
#### La xiriirka Wakiilka Diblomaasiga ah

Warqad kasta oo ogeysiin ama wargelin iyo la xiriir ahi oo ku socota Wasiirka W. Kalluumeysiga, kana hadlaysa gaadiidka kalluumeysiga ee shisheeye ama mid shati suge ah waa in lasoo mariyaa wakiilka diblomaasiga ah, haddii aan wasiirku soo jeedin hab taas ka duwan.

#### Qod. 5aad
#### Codsiga ruqsada

Codsi walba oo ruqsad waa inuu buuxiyaa shuruudahaan;

a. Inuu ahaado foomka 1aad ee lagu heshiiyey balankii koowaad.
b. In qoraal ahaan lagu hor dhigo Wasiirka, uuna hordhigo wakiilka diblomaasiga ah oo iska leh calanka gaadiidku ku diiwaangashan yahay.

#### Qod. 6aad
#### Bixinta Ruqsada/shatiga

1. Wasiirku wuxuu siin karaa ruqsad kalluumeysi mulkiilaha gaadiid kalluumeysi ajnabi ah ee horay codsi u soo qortay, haddii;
    a. Dawlada calanka gaadiidku ku diiwaangashan yahay leh ama hay'adda labada maamul u dhaxeysa ay la saxiixdeen Dawladda Puntland heshiisyo wax wada qabsi oo kalluumeysi.
    b. Wasiirku ansixiyey qorshe kalluumeysi, iyadoo saldhigu yahay Qoddobada khuseeya Gaadiidka kalluumeysiga shisheeyuhu leeyahay.
    c. codsiga ruqsadu yahay mid waafaqsan qorshaha guud ee kalluumeysiga

d. loo magacaabo gaadiidka isaga ah hubiye ama wakiil wadani ah sida cad Qoddobka 6aad.
e. Wasiirku sameeyey baaritaanka uu u baahnaa qoddobka 10aad ee sharcigan.
f. Codsaduhu soo qadimo howlaha ku saabsan bixinta khidmadda ama dulsaarka dalku leeyahay.

2. Warqad ruqso ah oo lagu bixiyo, iyadoo la cuskanayo qoddobkan, wuxuu la mid noqonayaa diiwaangelin marka loo eego qoddobka 5aad ee sharcigan..

## Qod. 7aad
## Qorshaha kalluumeysiga

1. Wakiilka diblomaasiga ah ee dalka aynu xiriirka la leenahay oo uu wasiirku u qoondeeyey qaybta la ogol yahay in laga jilaabto, kuna qeexan Qoddobka 5aad ee sharciga kalluumeysiga goobaha baddeed ee dhaqaale ahaan dalka Puntland goonida u ah, wuxuu soo bandhigayaa qorshahooda kalluumeysi. Kaasoo aan khilaafsanayn sharciga.
2. Qorshe kasta oo kalluumeysi waa inuu ahaadaa mid ku qoran af-ingiriisi, waana inuu yahay qoraal rasmi u muujinaya soohdinta kalluumeysiga, qabta dalku leeyahay oo ay ku jiraan faahfaahinta soo socota:
   - Goobta iyo meesha soohdinta dhaqaale ahaan u gaarka ah dalka Puntland oo markabku ka hawlgelayo,
   - Tirade runta ah ee gaadiidka kalluumeysi ee dalkaasi leeyahay ee shaqo tagay,
   - Waqtiyada ay imaanayaan ama ay ka tagayaan badda dhaqaale ahaan gaarka u ah dalka Puntland, gaadiidkaa isaga ah oo qiyaasan,
   - Inta qorshaha kalluumeysi ee la soo jeediyey qaadanayo.
   - Qoraal muujinaya inta jeer ee ay maraakiibtaas kalluumeysi ee ajnabiga ahi dalka puntland dekedaheeda imaanayaan muddada uu socdo qorshahooda kalluumeysi
   - Soo gudbinta wixii howlgal kale ah oo caawin kara gaadiidka ajnabiga inta uu ku jiro badda dhaqaale ahaan gaarka noo ah muddada uu socdo qorshaha kalluumeysi.
   - Wixii warar ah ee uu wasiirku u baahdo si uu u isticmaalo awoodiisa ku qeexan qoddobka 10aad ee sharcigan.
3. Wakiil kasta oo diblomaasi ah oo horey u soo gudbiyey qorshe kalluumeysi waxa u furan inuu wax ka beddelo markii uu dan moodo.
4. Wasiirku wuxuu ansixin karaa qorshayaasha kalluumeysi ee la soo hordhigo ama kuwa wax laga beddelayo.
5. Marka wasiirku ansixiyo qorshaha kalluumeysi ee cusub ama mid horey u jirey uu wax ka bedelayo waxaa u furan inuu cayimo waqtiga uu qorshahaasi shaqaynayo.

6. Wasiirka waxaa u furan inuu kolkuu damco uu laalo ama wax ka bedelo qorshe kalluumeysi oo horay loo ogolaaday ama in uu gabi ahaanba joojiyo ansixinta qorshayaasha kalluumeysi oo uu isleeyahay dan uma aha dalka.
7. Ansixinta qorshe kalluumeysi sina looguma fasiri karo xadiddaada awoodeed oo ku saabsab Wasiirka, marka loo eego ruqso siinta Gaadiid baddeedka cusub.

## Qod. 8aad
## Wakiilka Gudaha

Ruqso la siinayo ma jirto Gaadiidka kalluumeysiga shisheeyaha haddii ayan magacaabin wakiil dalka u dhashay oo ku hadli kara magaca mulkiilaha ama naakhuudaha markabka, mas'uuliyad sharciyadeedna aqbali kara.

## Qod. 9aad
## Khidmadaha & Dalacaado kale

1. Khidmadaha ruqsada iyo wixii dallacaado kale ah ee loo baahdo waa in la bixiyaa inta aan ruqsada la siin qofka codsadaha ah.
2. Bixinta khidmadaha ruqsada iyo dalacaadaha kale waxay noqonayaan sidan;
   a. Wasiirku wuxuu soo saaraya warqad lacag bixin ah oo ku aadan nin walba oo codsade ah, isagoo qeexaya lacagta laga rabo oo mid adag ah.
   b. Codsaduhu waa inuu bixiyaa lacag adag oo khidmad ahaan lagu yeeshay.

## Qod. 10aad
## Shuruudaha Ruqsada

1. Ruqsad kasta waa inay buuxisaa shuruudaha kalluumeysiga, waxaana ka mid ah;
   a. Baddeecada, baaxada, jinsiga, culeyska iyo tirade kalluunka ay tahay in la jilaabto iyo wixii taas xiriir la leh,
   b. Nooca, baaxada iyo qalabka kalluumeysi ee la isticmaalayo ama saran markabka dushiisa, habka bakhaarayntooda marka ayan shaqo hayn.
   c. Howlaha gaadiidka kalluumeysiga ajnabiga ah ee ruqsada loo siiyey waa in lagu dhaqaaqo marmar, waana inay ku ekaadaan biyaha kalluumeysiga ee badda dalka Puntland.
   d. Jilaabashada dheeraadka ah (by-catch) iyo tirade la ogolyahay.
   e. Baahida loo qabo in maraakiibta dushooda la saaro saraakiil idman ama goob-joogayaal.
   f. Hubinta iyo kormeerka gaadiid walba oo kalluumeysanayo ama caawinaya isaga waqtiga loo baahdo.

g. Marka gaadiidkaasi soo galo badda dalka Puntland.
h. In gaadiidka kalluumeysiga bixiyey warar, warbixin iyo wixii tirakoob ah ee la xiriira jilaabashada markabkaas, goobta uu joogo, uuna siiyo wasaaradda kalluumeysiga.
i. Tababaro lagu siiyo muwaadiniin soomaali ah habka gaadiidka shisheeye wax u jilaabayo iyo in loo soo gudbiyo soomaalida technolojiyada casriga ee kalluumeysiga.
j. In lagu hawlgeliyo muwaadiniinta soomaaliyeed ama dadka gobolada Puntland u dhashay ka faa'iideysiga khayraadka badda.
k. Muddada waqtiga ruqsadu shaqaynayso, waqtiga hawlgalkuna bilaabanayo.
l. Callaamadaha gaadiidka kalluumeysiga iyo wixii kale ee lagu aqoonsanb karo.
m. Inay si hagaagsan u rakiban yihiin ama ay u dayactiran yihiin qalabka badmareennimada ee saran markabka, si loo xaqiijiyo in la ogaado goobta iyo meesha uu taagan yahay gaadiidkaasi.
n. Khidmada la bixinayo iyo dalacaadaha la xiriira,
o. Fariimaha kolba uu bixiyo wasiirku, kuna saabsan baaris cilmiyeed kalluumeysiga biyaha badda goboladda Puntland.
p. Tilaabooyinka maamul ee ku qeexan qodobka 5aad iyo 6aad ee sharciga kalluumeysiga Puntland, iyo
q. Wax allaale wixii wasiirku u arko muhiim si loo ilaaliyo kheyraadka dabiiciga qaybta baddeed ee dhaqaale ahaan gaarka u ah Goboladda Puntland.

## Qod. 11aad
## Dib u habaynta shatiga/ruqsada

1. Haddii Wasiirku dib u habayn ku sameeyo qorshe kalluumeysi ee dal kale isagoo cuskanaya Qodobka 5aad, sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay inuu isna wax ka beddelo warqadda ruqsadda ah ee markabkaas qorshihiisa kalluumeysi dib loogu eegayo.
2. haddii wasiirku warqad ruqsadeed wax ka bedelo wuxuu wargalin arrintaas ku saabsan siinayaa wakiilka gudaha ee gaadiidkaas isaga iyo qofka shatigaas ogolaansho loo rabo.
3. wax ka bedelidu ama dib u habayntu waxay dhaqan galaysaa 7 maalmood ka dib marka la wargeliyo wakiilka gudaha.
4. marka shatiga wax laga bedelo, lana ogeysiiyo wakiilka gudaha waxaa loo baahan yahay in 72 saacadooda kolka uu ku soo xirto dekedda ugu horeysa in mulkiilaha ama naakhuuduhu la socodsiiyo isbedelkaas qofka ay khuseyso si ogolaansho loogu helo.
5. markii shatiga la arko, oo la ogolaado, waa in loo celiyaa naakhuudihii ama mulkiilaha markabka.

## Qod. 12aad
## Beddelida ruqsada/shatiga

Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo nuqul ama koobi shatiga ah naakhuudaha gaadiidka kalluumeysi ee ajnabiga ah, marka uu bixiyo lacagta khidmada ee loogu talagalay;

1. goorta uu ku qanco ama ruqsadii si kama' ah u luntay, ama uu tirtirmay ilaa xad aan la akhriyi karin, ama
2. sidii kale ee ay wasiirka ula muuqato.

## Qod. 13aad
## Ruqsada/Shatiga aan la wareejin Karin

Shatiga ama warqda ruqso ee lagu bixiyey iyadoo la cuskanayo qoddobka lambarkiisu yahay 17aad ee sharciga kalluumeysiga, laguma wareejin karo gaadiid kalluumeysi ama markab kale.

## Qod. 14aad
## Shatiga/Ruqsada lagu haynayo gaadiidka kalluumeysi dushiisa.

Marka aan lagu darin Qoddobada tirsigoodu yahay 11 iyo 16, shati ama warqad kasta oo ruqso waxaa loo baahan yahay in laga helo markabka dushiisa, iyadoo hagaagsan, si ay u kormeeraan saraakiisha idmani.

## Qod. 15aad
## Hubinta shatiga/ruqsada

Naakhuude kasta oo markabkiisu ka kalluumeysanayo baddaha goboladda Puntland waa inuu shatigiisa ama ruqsadiisa tusaa saraakiisha idman marka loo baahdo.

## Qod. 16aad
## Hakinta ama burinta shatiga/ruqsada

1. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu muddo laalo (suspension) amaba kala noqdo fasaxii, haddii uu taas dan moodo, gaadiidka kasta oo kalluumeysi oo shisheeye;

a. Haddii ay caddaato in mulkiiluhu ama naakhuuduhu ku gafey shuruucda nidaamka loo dejiyey maamulka gaadiidka kalluumeysiga iyo sababihii lagu bixiyey shatiga,

b. In wasiirku is yiraahdo tallaabadan in la qaado waxaa u baahan habsami u socodka maamulka hawlaha kalluumeysiga,

2. Wasiirku wuxuu u gudbinayaa warqad wargelin ah oo ku saabsan laalidda ama burinta shatiga wakiilka gudaha, wuxuuna talo ka siinayaa qofka ay tahay warqadaani inay gaarto.

3. 72 saacadood marka la gudbiyo warqadda laalida ama burinta sharciga, waxay mulkiilaha markabka ama naakhuudaha ku wareejinayaan shatiga qofkii loo asteeyey.

4. haddii shati la laalo ama la buriyo iyadoo sharcigaan loo cuskanayo, loogana gol leeyahay maamul wanaagsanida kalluumeysiga, qaybtii khidmadeed ee shuruudihii la kala qortay kuwii aan waqtigoodii dhicin waa in la siiyo shatiga.

**Qod. 17aad**
**Xaqa cabashada**

Qof kasta oo ay waxyeelo kasoo gaartay tallaabo uu qaaday wasiirku isagoo cuskanaya qoddobka 14-aad, wuxuu u xaq u leeyahay in uu cabashadiisa gaarsiiyo Madaxweynaha DPL haddii uu ku qanci waaya go'aanka Madaxweynaha, wuxuu u gudbinayaa dacwaddiisa Maxkamada Sare.

**Cutubka 2aad**
**Habka Ilaalinta Gaadiidka Shisheeyaha ee ka kalluumeysanaya Baddaha Puntland**

**Qod.18aad**
**Ka Kalluumeysiga Baddaha loo aqoonsan yahay Dawladda Puntland waa reeban tahay**

Nin la-kalluumeysan kara ama heshiis la geli karaa ma jiro gaadiidka kalluumeysi oo ajnabi ah, baddda loo aqoonsan yahay Dawladda Puntland.

## Qod. 19aad
## Meeleynta qalabka kalluumeysi.

1. Gaadiid kasta oo ajnabi, oo sharcigaani khuseeyo inta uu joogo soohdinta kalluumeysi ee Badda Puntland, waa inuu qalabkiisa kalluumeysi ku haysto meel haboon oo markiiba laga heli karo, waana inuu u hogaansamaa sharcigaan;
   a. Qalabka kalluumeysiga idil ahaan waa in lagu hayaa gudaha ama sagxada markabka , lagana fogeeyaa meesha caadi ahaan lagaga kalluumeysto,
   b. Shabag oo dhan gaar ahaan kuwa doonyuhu ay jiidaan iyo waxa culeysiyaba waa in laga furaa xargaha iyo wixii dhismo ah oo loogu talagalay inay daadiyaan,
   c. Wixii qalab kalluumeysi ah ee saaran sagxada markabka waa in la geeyaa dhismaha sare ee markabka, iyo
   d. Gaadiidka kalluumeysiga ee loo yaqaan "purse seiners", (purse seiner waa gaadiid sita shabaag gaar ah) qalabka wax lagu rogo waa in la geeyaa meel hoose si aan howlgal kalluumeysi loogu samayn, hase yeeshee laga gaari karo haddii loo baahdo doonyaha nafta-badbaadiya iwm.
2. Sharcigani wuxuu qabanyaa;
   a. Gaadiid kasta oo ajnabi leeyahay oo aan ku ruqsadaysnayn qoddobka lambarkiisu yahay 6.
   b. Mid kasta oo ruqso haysta, hase yeeshee aan marin baaritaan dekedda gudaheeda, sida qoddobka lam. 22 u baahan yahay. iyo
   c. Gaadiid kasta oo ajnabi ah, shati leh, lana baraxo ka tegidiidsa goobta dhaqaale ahaan gaarka inoo ah si qoddobka lambarkiisu yahay 23 qabo.

## Qod. 20aad
## Kala wareejinta shixnadda.

1. wax kalluun shixnad ah lagama rogi karo gaadiid kalluumeysi ee shisheeye oo mid kale laguma rogi karo in arrintaasi ay ka dhacdo dekedda loogu talagalay, ogolaanshaha wasiirka mooyee.
2. Farqada 1aad ee Qoddobkan waa inayan khuseyn kala wareejin shixnadeed, taasoo hoos imaanaysa agaasinka ama sarkaal idman.

## Qod. 21aad
## Wargelinta soo gelida soohdinta.

1. gaadiid kalluumeysi oo ajnabi leeyahay, sharciganina qabanayo, oo soo geli karaa ma jiro badda dhaqaale ahaan u gaarka ahGoboladda Puntland, kamana iman karo badweynta haddii aan marka hore 24 saac gudahood imaanshahaas lagu soo

a. magaca, callaamada wicida, calanka saran gaadiidka iyo dawladda leh,
b. loolka iyo dhigaha meesha uu kasoo gelayo dalka,
c. dekedda uu tagayo si loo hubiyo, salka ku haynta qodobka 20aad.
d. Nooca kalluun ee saaran, ttirada iyo xaalada kalluunaasi ku sugan yahay.

2. Sharcigaani wuxuu khuseeyaa;
   a. Markab ama gaadiid kasta oo ajnabi ah soona gelaya baddaheena dhaqaale isagoo ujeedadiisu tahay inuu ruqsad weydiisto, iyo
   b. Mid kasta ruqsad ama shati horay loo siiyey.

## Qod. 22aad
## Hubin dekedeed

1. Gaadiid walba oo Qod. 16aad uu qabto, marka uu soo gelayo baddeena waa inuu si toos ah u tago deked lagu baaro ama lagu hubiyo waxa saaran.
2. Gaadiid aan ruqso wadan kama imaan karo badweynta oo ma soo geli karo goobaha dhaqaale ahaan gaarka inoo ah haddii uusan fasax doon ahayn. Fasaxaas waxaa bixin kara sarkaal idman oo jooga dekedda hubinta.

## Qod. 23aad
## Hubin intaan laga bixin soohdinta.

1. Gaadiid aan shati lahayn ma gali karo badweynta oo masoo geli karo goobaha dhaqaale ahaan gaarka inoo ah, haddii uuna fasax ka wadan sarkaalka idman oo jooga dekedda wax lagu hubinayo.
2. Gaadiid kasta oo ruqsad lihi oo ku mutaystay fasax, iyadoo la cuskanayo farqada 1aad ee Qoddobkan markuu ka goosto dekedii hubinta waa inuu si degdeg ah badweynta u tagaa.
3. Gaadiid aan ruqsad ama shati wadani, lana siiyey warqad fasax ah iyadoo lagu salaynayo farqada 1aad ee qoddobkan, kama kalluumeysan karo badda dhaqaale ahaan Goboladda Puntland gaarka u ah haddii uunan marka hore u gudbin badweynta.

## Qod. 24aad
## Ka cafin hubin dekedeed

Wasiirku waa uu ka cafin karaa marar gaar ah gaadiid ruqsad haysta inuu u hoggaansamo Qoddobada 19 iyo 23, isagoo caddaynaya sababta.

## Qod. 25aad
## Deked soo gelid

Kolka markab ama gaadiid kalluumeysi doonayo inuu soo galo dekedaha Goboladda Puntland mid ka mid ah, wasiirka waxa lagu soo wargalin doonaa wax ka yar 24 saacadood tafaasiishaan;

a. Magaca, callaamada wicidda iyo calanka iyo dawladda gaadiidka iska leh.
b. Dekedda uu doonayo inuu ku soo xirto, iyo
c. Ujeeddada imaanshihiisa.

## Qod. 26aad
## Calammada

Markab ama gaadiid kasta waa inuu inta uu biyaha kalluumeysiga Goboladda Puntland ku jro uu muujiyaa labada calan, kan soomaaliyeed iyo midka dalkiisa.

## Qod. 27aad
## Calaamadaha

1. Gaadiid kasta oo ruqsad lihi waa inuu mar walba inta uu ku jiro biyaha kalluumeysiga baddaha Goboladda Puntland, muujiyaa si aan mugdi ku jirin Calaamadda wicidiisa, far-waaweyn ku qoran oo ah laatiin iyo carabi labadaba. Fartaa iyad ah waa in laga akhrin karaa hawada iyo dhinaca badda.
2. Iyadoo xadidnayn baahiyaha kala duwan ee farqada 1aad ee qodobkan;
   a. Marka gaadiidku dhererkiisu ka badan yahay 20 mitir, matal ahaan waa in eraya ku qoran aan dherekiisa guud unan dhaafsiisnayn 20 meter, markaas xuruufta ku qorani waa in ayan ka yarayn meter barkii dherer ahaan.
   b. Gaadiidka ruqsada aan haysan kama kalluumeysan karo goobta (zone), haddii qalabkiisa kalluumeysiga uunan ahayn mid markiiba la arki karo, callaamadihiisa wicitaan la akhriyi karo si loo ogaado gaadiidkaas cida leh.
   c. Mulkiilaha ama Naakhuudaha gaadiidka kalluumeysi oo shisheeye, kana howlgalaya Gobolada Puntland, hase yeeshee aan callaamadahaas lahayn sida sharcigu qorayo waxaa loo arki doonaa gef, wuxuuna mutaysan doonaa ganaax dhan USD 10,000.

## Qod. 28aad
## Nalalka bad-mareenlmada iyo qaabkooda Is-afgarasho

Gaadiid kasta oo ruqsad u lihi, kana howgalaya Puntland waa inuu muujiyaa nalalka iyo noocyadooda kala duwan sida ay qorayaan shuruucda caalamiga, si looga taxadaro isku dhac badda gudaheeda, sharcigaas oo meel maray 1972, waxaa loogu talagalay in lagu badbaadiyo gaadiidka iyo hawlaha ay hayaan labadaba.

## Qod. 29aad
## Isgaarsiin

1. Gaadiid kasta oo ruqsad haysta, joogana badaha kalluumeysiga ee Puntland waa inuu wataa daabacaadiisa ugu danbaysa ee fariimaha qarsoon ee caalamku isku afgarto (International code of signals), ayna soo saareen Ururka dawladaha ka dhexeeya ee laga tashado arrimaha badda (Inter. Governmental Maritime Consultative Organization) iyo guddiga nabadgelyada baddaha (Maritime Safety Committee) oo look ala yaqaan IMCO iyo MSC, siday u kala horeeyaan.
2. Qof walba oo saran gaadiid ruqsad leh ama ha ahaado naakhuude ama sarkaal waa inuu yaqaan sida loogu shaqeeyo callaamadahaas qarsoon.
3. Xiriir kasta ha ahaado Raadiye, Calan ama Nal, dhex marana gaadiid ruqsad leh iyo Dawladda Puntland callaamadaha qarsoon ee lagu heshiiyey waa in la isticmaalo.
4. Marka lagu amrayo gaadiid in uu joogsado, callaamadaha waa sidan:
    a. Iyadoo la saaro calanka laysku afgarto una dhigma (l)
    b. Iyadoo la isticmaalayo taarka morse xarafkiisa (l) iyo
    c. Iyadoo la afuufo gees ama firimbi si loo caddeeyo taarka morse xarafkiisa (L)
5. Marka sarkaal idman oo saran gaadiid dawladeed uu damco inbuu fuulo gaadiid kalluumeysi ah, callaamada gaadiidka xukuumaddu isticmaalayso waa:
    a. Iyadoo la saaro calanka laysku afgarto (International code flag) una dhigma SQ3.
    b. Iyadoo la isticmaalo taarka morse xarafkiisa SQ3
    c. Iyadoo la afuufo gees ama firimbi si loo caddeeyo xarafka qarsoon ee caalamiga ah (International code letter) una dhigma SQ3.

## Qod. 30aad
## U-hogaansanaanta ammarada

1. Naakhuude ama xubin kasta oo saran gaadiidka ruqsadda leh inta uu ku jiro baddaha Puntland waa inuu u hogaansanaadaa, oo qaataa ammarada iyo fariimaha saraakiisha idman, gaar ahaan hadey ka dalbadaan;
    a. Inuu joojiyo gaadiidka
    b. Inuu ogolaado in sarkaal idmani fuulo gaadiidkiisa, gacana uu ka siiyo haddii loo baahdo in wax la hubiyo; iyo
    c. Inuu dekeda kusoo xiro haddii loo baahdo.
2. Naakhuude kasta ama xubin walba oo shaqaalaha ka mid ah gaadiid ruqsad leh oo aan garanayn callaamadaha ka imaanaya gaadiidka xukuumada ama diyaaradeed, faahfaahin dheeraad ahna waaya, waa inuu gartaa in lagu amray markabka inuu u joojiyo si degdeg ah.

## Qod. 31aad
## Diiwaangelin iyo xafidaad

1. Naakhuude kasta oo gaadiid ruqsad leh waa inuu mar kasta uu ku hayaa marka dushiisa buugga diiwaangalinta (Ship's log) o oaf ingiriis ah, buuggaas diiwaan galinta waa in lagu qoraa taariikhda, waqtiga daabacaada amar walba, fariimaha loo soo gudbiyey naakhuudaha kana yimid Wasiirka ama sarkaalka markaas shaqada ku leh.

2. Naakhuude kasta waa inuu ku hayaa markabka dushiisa nuqul ah buugga diiwaangalinta kalluumeysiga (Fishing log) oo gooni ah buuggaas oo af ingiriis ku qoran, waxaana la galinayaa wararka ku saabsan dhaqdhaqaaqiisa maalin laha ah sida;
    a. Habka kalluumeysi uu isticmaalay;
    b. Howsha kalluumeysi ee gaadiidka oo qeexan sida shabaagihiisa iyo isku aaggaga kala duwan ee uu ka howlgeliyey, baaxada uu dhigay, tirade jilaabasho ee maalintaas;
    c. Goobta kalluumeysigaasi ka dhacay marka la eego dhigaha iyo loolka;
    d. Caddayn ku saabsan kalluunka la jilaabtay tiradiisa iyo isku celcelin ahaan inta uu le'eg yahay nooc walba iyadoo culayskiisa la eegayo.
    e. Noocyadii kalluun ee lagu celiyey badda iyo tiradooda.
    f. Iyo wixii warar kale ah kuna saabsan kalluumeysi ee ka socda baddaha Puntland ee uu u baahdo wasiirku si loo hubiyo dhaqdhaqaaqa guud.
3. buugga diwaan galinta kalluumeysiga waa in loo xafidaa hab ay wasaaraddu illaaftay oo ogolaatay.
4. Naakhuude kasta oo markabkiisu ruqsad leeyahay waa inuu 72 saacadood gudahood mar walba oo uu soo galo biyaha laga kalluumeysto ee Puntland u soo

gudbiyaa buugga diiwaan galinta kalluumeysiga wasiirka, nuqulna kula haraa gaadiidka dushiisa.

## Qod. 32aad
## Warbixinta

Gaadiid kasta oo ruqsad leh inta uu badda laga kalluumeysto ee Puntland joogo, waa inuu warbixin todobaadle ah u gudbiyaa wasiirka ama qofkii uu u xilsaaray shatiyada, siiyaana wararka soo socda:

1. magaca, callaamada wicida iyo dalka gaadiidkaas ka diiwaan gashan yahay;
2. lambarka shatiga/ruqsada kalluumeysiga;
3. meesha uu gaadiidkaasi ku sugan yahay iyadoo loo eegayo dhigaha iyo loolka;
4. tirada iyo nooca kalluun ee la jilaabay intii ka dambaysay hubintiii dekedeed ama warbixintii raadiye oo kiilaysan.

## Qod. 33aad
## Wargelinta dhamaystirkii qoondayntii lagu heshiiyey

Wakiil kasta oo diblomaasi ah waxna loo qoondeeyey waa inuu ku wargeliyaa wasiirka arrimaha soo socda:

1. dhamaystirka qaybtii dalkiisa loo doondeeyey;
2. dhamaystirka intooda loo qoondeeyey, goobtii loo qorsheeyey in howlahaasi ka dhacaan iyo habkii kalluumeysiga ee loo isticmaalay.

## Qod. 34aad
## Ka-fogaanshaha qalabka kalluumeysiga ee markabka ama gaadiid kale

Naakhuude kasta ee gaadiid kalluumeysi ee ajnabi ah, kuna jira biyaha badda dhaqaale ahaan Puntland gaarka u ah, waa inuu gaadiidka kale iyo qalabkiisa kalluumeysi u jirsadaa mar kasta mayl barkiis fogaanshaha nautical, waana:

1. in la dhigo badda gudaheeda, labada dhinacba ka xiran tahay;
2. in qalabkaas kalluumeysi uu calaamadaysan yahay si uu u arki karo qof ama gaadiid u jira mayl barkiis xawaaraha badda ee nautical.

**Qod. 35aad**
**Wasakhaynta deegaanka iyo**
**dayacaada qalab kalluumeysi.**

1. haddii, aan xaalad degdeg ah ama khatar lihi ku imaan gaadiidka ama raga saran, ma jiro markab ka tagi kara si kama ah ama ula kacba ah badda gudaheeda alaab ay ka mid yihiin qalab kalluumeysi oo la dayacay iyo wixii kale oo deegaanka iyo badeecada wasakhayn kara bilacsamideeda. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara:
   a. wax alaale wixii waxyeelo kheyraadka dabiiciga ah ee badda u gaysan kara;
   b. faragelin lagu sameeyey howlaha kalluumeysiga ee socda ama qalabka lagu jilaabto ama gaadiidka naf ahaantooda iyo
   c. wixii khasaaro u keeni kara bad-mareenimada idil ahaan.
2. Haddii ayba dhacdo in si kama ah looga tago qalab badda gudaheeda ama wasakh deegaanka wax u dhimi karta lagu shubo, arrimahaana uu la kulmo Naakhuudaha gaadiidka, waxaa loo baahan yahay inuu markiiba soo gaarsiiyo Wasaaradda, iyadoo khabarka la siinayo ay ka mid yihiin:
   a. Magaca naakhuudaha warbixinta keenay iyo callaamadda wicida gaadiidkiisa;
   b. Waxaa qalabkaas laga tagay ama lala kulmay yahay;
   c. Meesha qalabkaas laga tagay ama goobta lagu shubay wasakhda iyo
   d. Waqtiga iyo taariikhda arrintu dhacday.

**Qod. 36aad**
**Bad-mareenimada iyo hab-dhaqankeeda.**

Ruqso/shati ma jiro ka cafiyaya gaadiidka kalluumeysiga ama naakhuudaha iyo shaqaalihiisa wixii waajibaad ah ee sharcigu farayo, sida: sharciyada khuseeya bad-mareenimada, canshuuraha, dal soo gelida iyo laanta socdaalka, caafimaadka iyo nabadgelyada iwm.

**Cutubka 3aad**
**Cilmi-baarista kalluumeysiga badda**

**Qod. 37aad**
**Oggolaanshaha layska rabo si baaris cilmiyeed ee kalluumeysi loo sameeyo.**

1. Baaris cilmiyeed kalluumeysi oo laga qaban karaa ma jirto baddaha dawladda Puntland, haddaan marka hore ogolaansho laga helin Wasiirka Wasaaradda kalluumeysiga.
2. iyadoo la cuskanayo Qoddobka 35, wuxuu wasiirku cayimayaa goobta iyo meesha baarista lagu samaynayo oo ka samaynayaan dawlad ama urur caalami oo

howshaas karti u leh. Ujeedadda cilmi baaristaas oo ah mid nabadgelyo ah waxaa loogu talagalay in sare loogu qaado cilmiga baddaha loo leeyhay guud ahaan iyo kan dalka Puntland gaar ahaan.

## Qod. 38aad
## Xaqa loo leeyahay inaan ogolaansho la bixin

Ururka cilmi-baarista ee Wasaarada Kalluumeysiga waxa kale oo awood u leeyahay inuu u diido dawlad ama urur caalami ah inuu cilmi baaris ku sameeyo baddaha dawladda Puntland, haddii ay is leedahay mashruucaasi:

1. wuxuu macne toos ah u leeyahay baarista (Expoloration) iyo ka faa'iideysiga (Emploitation) khayraadka dabiiciga ah naflayda iyo ma noolayaasha labadaba.
2. qoditaanka badda laga samaynayo ama isticmaalida waxyaabaha qarxa amaba in lagu shubo gudaheeda wax deegaanka (environment) u daran.
3. iyadoo wararka mashruucooda ku saabsan marka la eego qoddobka 38 laga helo in ujeedadii ay horay u soo sheegeen khilaafsan yahay, waxa kale oo sabab u noqon karta in baaris-cilmiyeed laga diido dawladaas iyada ah ama ururkaas haday jirin arrimo taagnaa oo aan meel laysla dhigin ka dhexeeyey hay'adaas iyo dawlada Puntland.
4. haddii uu faragalin ku samaynayo mashruucaasi howlo dawladda u socday iyadoo meel marinaysa awoodeeda ama xuquuqda iyo siyaasadaheeda dawladnimo, sida ay qeexayaan shuruucda baddaha ka yaaal (Maritime zone act) iyo sharcigii caalami ah ee arrintaas khuseeya.

## Qod. 39aad
## Codsiga cilmi-baarista la xiriirta kalluumeysiga

1. Dawlad ama urur kasta oo doonaya inuu cilmi-baaris kalluumeysi ah ku sameeyo baddaha dawladda Puntland waa inuu 6 bilood gudahood inta uunan howlgalin u soo gudbiyaa Wasaarada Kalluumeysiga u qaabilsan cilmi-baarista iyadoo sharaxan:
   a. Dabeecadaha iyo ujeeddooyinka mashruuca;
   b. Magaca hay'ada ku shaqada leh xoghayaheeda iyo madax mashruuca;
   c. Magacyada, qoraal gaaban oo ku saabsan taariikh nololeedkooda iyo waxbarashadooda (C.V.) ee culimada gaadiidka saran;
   d. Habka iyo qalabka la adeegsanayo sida magaca, culayska, nooca iyo inta gaadiidka wax baarayaa le'eg yahay iyo ugu danbayn qalabka cilmi baarista oo markabka saran;
   e. Goobta joqoraafi ee baaritaankaasi ka dhacayo;

f. Waqtiga imaanshaha ama tegitaanka ee gaadiidka ama qalabka la isticmaalayo iyo dib u furfurkooda;
g. Ilaa xadka mashruucu aqbali karo in saynisyahanada dawlada Puntalnd ay ka qayb qaadan karaan ama qof wakilan karaan.

2. Dawladaas iyada ah ama ururkaasi waa inuu warqad ogolaansho ah ka dalbaa Wasiirka kalluumeysiga, taasi oo uu qabo Qodoobka 3aad.

## Qod. 40aad
## Waajibaadka ah in loo hogaansamo shuruudaha cilmi-baarista

Dawlad ama urur kasta oo howlaha cilmi-baarista ku lug leh oo cilmi baaris kalluumeysi ka qabta baddaha dalka Puntland, waa inuu fuliyaa shuruudahan:

1. In dawladda Puntland, haddii uu doonayo, loo ogolaado ka qaybgal ama qof wakiil uga ah mashruuca cilmi-baarista, la socda oo saran gaadiidka dushiisa, dawladdu waxay kaloo doonaysaa iyadoon lagu waajib yeelin, inay gacan ka gaysato qiimaha mashruuca;
2. in mashruucu us oo gudbiyo Wasaarada Kalluumeysiga, warbixinada googol-xaarka iyo go'aanka kama dambaysta ah iyo gabagabada mashruuca;
3. inuu marka uu codsado wasiirku loo ogolaado wixii macluumaad ah eek u saabsan mashruuca;
4. in loo gudbiyo wasiirka wixii ka soo baxay cilmi baarista iyadoo faahfaahsan;
5. in macluumaadka cilmi-baarista kasoo baxay, haddii wasiirka laga helin fariin taas ka duwan, la ururiyo, lana xafido iyadoo nuqulo leh. Nuqul ka mid ah macluumaadkaas waxaa lagu wareejinayaa waaxda saynisyahanada wasaarada kalluumeysiga dabadeedna sida ugu dahfsaha badan, iyadoo la marayo mariinada dalka iyo tan caalamka, si loogu soo saaro gabagabadii cilmibaarista;
6. haddii aan heshiis kale jirin, in la furfuro wixii dhisme ah ee cilmi baaristu kaliftay marka howshu dhammaato.

## Qod. 41aad
## Bixinta Waraaqda oggolaanshaha

1. Marka mashruuca cilmi-baarista ay ogolaadaan waaxda saynisyahanada wasaarada, wasiirku wuxuu bixin karaa oo siinayaa mashruuca cilmi baarista ee ajnabiga ah warqadda ogolaanshaha ah isagoo qiil ka haysta Qoddobka 10aad.
2. Goorta ogolaanshaha la bixinayo, wasiirku wuxuu ku isticmaali karaa shuruudihii loo dejiyey ruqsada kalluumeysiga. Shuruudaha ay soo jeediyaan waaxda saynisyahanada wasaaradu iyo shuruudihii cusub oo kale oo loo arko inay waqtiga iyo meesha ku haboon yihiin.

**Qod. 42aad**
**Hakinta iyo Joojinta Cilmi-baarista.**

1. Wasiirku isagoo talo ka qaadanaaya waaxda saynisyahanda Wasaarada wuxuu amri karaa hakinta howlaha cilmi-baarista kalluumeysiga ee ka socda baddaheena, haddii iyo marka:
   a. La ogaado in howlaha cilmi-baaristu aynan ku socon habkii laysku ogaa ee waafaqsan Qodd. 37, kaasoo ogolaanshuhu ku salaysnaa;
   b. Ama marka dawladaas iyada ah ama ururkaas cilmi-baarista wada uu dhowri waayo shuruudihii Qoddobka 38aad uu qorayey.
2. Wasiirku isagoo la tashanaya waaxda saynisyahanada wuxuu joojin karaa gabi ahaan howlaha cilmi-baarista haddii la dhowri waayo shuruudihii Qoddobka 38aad uu qorayey:
   a. Marka la ogaado ka weecashada waddadii lagu heshiiyey, kuna qotontay Qoddobka 37aad, taasoo ogolaanshuhu ku salaysnaa; ama
   b. Xaaladihii laysla falanqeeyey aan lagu sixin muddo caqligal ah sida ay rabto waaxda saynisyahanada ee wasaaradda.
3. Marka wasiirku ku wargeliyo hakinta ama joojinta arrinta ku saabsan dawladii ama hay'adii ay khusaysay waxaa loo baahan yahay in si degdeg ah howlaha cilmi-baaristu u istaagaan.
4. iyadoo la cuskanaayo farqada 1aad ee Qoddobkan, wasiirku isagoo la tashanaaya waaxda cilmi-baarista, wuxuu amri karaa in xanibaada ama hakinta laga qaado dawladda ama ururka cilmi-baarista wada hadduu u hogaansamo ku dhaqanka shuruudihii loo baahnaa, kuna qoran Qoddobada 37 iyo 38 muddo caqligal ah, muddadaas waxaa xadidaya waaxda saynisyahanada ee wasaaradda.

**Cutubka 4aad**
**Qoddobo kala duwan**

**Qod. 43aad**
**Awooda Saraakiisha Idman**

1. Si loo' hirgeliyo qoddobada uu sharcigu qoraayo ee la xiriira kalluumeysiga, Sarkaalka Idman waxaa u banana;

   a. Inuu joojiyo, fuulo, baaro gaadiid kasta oo kalluumeysi ee shisheeye leeyahay ama muwaadin, kuna jira biyaha badda laga kalluumeysto ee Puntland.

b. Inuu codsado nuqulada warqada ruqsada, buggaagta diiwaan galinta iyo wixii dokumenti ah ee loo baahan yahay in gaadiidka dushiisa lagu hayo.
c. Inuu codsado oo eego shabaagta kalluumeysiga iyo wixii qalab kale oo loogu kalluumeysto ama eego wixii kalluun ah ama dhirta badda hoosteeda ka baxda ee saran gaadiidka.
d. inuu eego ama ka qaato sambalo (samples) kalluun kasta ama uu furo qalab kasta oo wax ku jiraan ee saran gaadiidka.
e. inuu sawiro ka qaado qayb kasta oo gaadiidka ka mid ah xamuulkiisa, qalabka ama nuqulo ka samaysto buug kasta, dokumentiga iyo buuggaagta diiwaangalinta ee markabka dushiisa saran.
f. inuu su'aalo weydiiyo Naakhuudaha iyo ragga la shaqeeya si uu u hubiyo in wax dembi ah ay sharciga ka galeen.
g. iyadoo la meel marinaayo sharciyada Soomaaliyeed ee khuseeya arrimahan, wuxuu Sarkaalka Idmani siin karaa gaadiidkaas kalluumeysiga amaro ay ka mid yihiin sida loo soo xirto iyo sida xeebta loot ago. Wuxuu kaloo u sheegi karaa Naakhuudaha wax allaale wixii qalad ah ee sharcigii shatiga ama ruqsad lagu siiyey ka hor imaanaya.
a. Wuxuu kaloo sarkaalka idmani u gudbin karaa Naakhuudaha iyo xubnaha kale ee gaadiidkaas wixii uu Is leeyahay waa loo baahan yahay sharcigana waafaqsan.

3. Sarkaal kasta oo Idmani haddii uu is leeyahay amaba hubiyo inuu dambi dhacay waxaa u bannaan:
   a. inuu qabto gaadiidkaas kalluumeysiga, shabaagta iyo qalab kasta ee kalluumeysi oo uu isleeyahay waxaa loo isticmaalay dembigaas.
   b. Inuu qabto kalluun kasta ee uu isleeyahay jilaabashadiisa waxaa loo isticmaalay qalabka dembiga lagu galay.
   c. Inuu xiro qof kasta ee uu isleeyahay wuxuu galay dambigaas.
   d. Inuu qabto waxyaalaha qarxa, sun iyo wixii kale oo waxyeelo leh ee loo isticmaalay dambiga, iyadoo lagu xadgudbayo Qod. 15aad ee sharcigan.
4. Alaabooyinka la qabtay markay suurogal tahay waa in laga bixiyo qoraal iyo wixii kale oo lagula wareego, iyadoo la sababaynayo.
5. Qof allaale qofkii la xiro iyadoo la cuskanayo farqada 2aad ee Qoddobkan waa in sida ugu dhaqsaha badan loo horgeeyo maxkamad.
6. Kalluun ama wixii kale ee la qabtay oo aan muddo sii joogi Karin waa in la iibiyo dabadeedna meesheedii lacagta la geliyo.

## Qod. 44aad
## Goob-joogayaal

Si loo ururiyo macluumaadka. Loona hubiyo habsami u socodka howlaha kalluumeysiga, Wasiirku wuxuu gaadiidka saari karaa qof goob-jooge ah (Observer). Markab kasta oo goob-jooge loo asteeyaa waa inuu:

1. Geeyaa goob-joogaha ama ka qaadaa meesha wasiirku amro.
2. Siiyo goob-joogahaas ka socda wasaarada seexasho iyo cunno u dhiganta kuwa la siiyo saraakiisha gaadiidka saran.
3. Goob-joogaha loo ogolaado inuu isticmaalo qalabka isgaarsiinta ee gaadiidka.
4. Iyo in la siiyo goob-joogaha wixii kale oo gacan ah ee uu u baahdo sii uu waajibkiisa u guto.

## Qod. 45aad
## Nabadgelyada

Naakhuude ama xubin kasta oo shaqaalaha gaadiidka ka mid ahi waa inay qaadaa tilaabo walba oo lagu ilaalinaayo nabadgelyada Sarkaalka idman ama goob-joogaha.

## Qod. 46aad
## Ganaaxyadda

Naakhuude ama Mulkiile kasta oo gaadiid kalluumeysi ee ajnabi ah ama muwaadin ah, haddii uu ku gafo shuruucdaan iyaga ah waxaa la ganaaxayaa lacag dhan US$ 10,000 (Toban kun oo Doolar).

## Qod. 47aad
## U-qaadasho

Haddii dambi laga galo shuruucdaan ama habka iyo howlaha kalluumeysiga inta lagu jiro goobta dhaqaale ahaan u gaarka ah dawladda Puntland, wixii kalluun ah ee gaadiidkaas saran waa la qaban doonaa inta laga helayo caddayn.

# Qaybta 3-aad
# Gaadiidka Kalluumeysiga Wadaniga ah

## Cutubka 1aad
## Shati siinta Gaadiidka kalluumeysiga Wadaniga ah

## Qod. 48aad
## Ruqsada loo baahan yahay

1. Qofna uma isticmaali karo Gaadiid kalluumeysi gudaha biyaha kalluumeysiga Puntland haddii aan ruqsad la siin.

2. Ruqsadan waxay khuseysaa doonyaha kalluumeysiga wadaniga ee qaadkoodu yahay sideed (8) tan iyo wixii ka badan.
3. Ruqsad & ogolaansho kalluumeysi waxay ku waajibaysaa:- ;

   B- gaadiid Kalluumeysanaya
   T- Ganacsi kalluun samaynaya, kaydinaya ama habaynaya.
   J- Xamuul kalluun qaadaya
   X-Cilmi baaris samaynaya
   Kh-ama samaynaya hawlaha la xiriira kalluumeysiga.

4. Doonyaha wadaniga ah ee hoos ku tilmaaman waa laga dhaafay ruqsada, balse waxaa ku waajib ah diiwaangelin.
   i. Huuriga
   ii. Doonyaha matoorka leh oo tankoodu ka yar yahay 6 (lix tan).
5. Doonyaha caawiyaha ama badbaadada ee ay isticmaalayaan gaadiidka ruqsada la siiyey ku waajibimayo shati ama ogolaansho.
6. Gaadiidkii ruqsad la'aan ku kalluumeysta waxaa lagu ganaaxayaa US $500 (Shan Boqol Doollar).

## Qod. 49aad
## Codsiga Ruqsada

1. Codsi kasta oo ku saabsan ruqsada doonyaha wadaniga ah waxaa qoraal ahaan loogu soo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasimaha Guud.
2. Ruqsad walba waa inay tilmaamtaa goobta, nooca kalluunka, xeeladda la adeegsanayo, qalabka, goobta dejinta/rarida, qiyaasta kalluunka iyo dhammaan aaladaha isgaarsiinta, dab deminta, badbaadada iyo callaamadaha.
3. Codsade walba waa inuu buuxiyaa shuruudaha ruqsad bixinta ee ku tilmaaman Qoddobka 10-aad ee xeerkan.
4. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa lagu ganaaxayaa US $ 20(Labaatan Doollar).

## Qod. 50aad
## Bedelida Ruqsada/shatiga

Agaasinka Guud wuxuu awood u leeyahay inuu amro bedelid, rusad ama shati kalluumeysi gaadiidka wadaniga ah haddii uu ku qanco warbixinta saraakiisha kalluumeysiga, ka dib baaritaankooda, haddii uu shatigu lumay, dilaac weyn ama tirtirmid xoog leh ilaa xad aan la akhrin Karin ay soo gaarto.

## Qod. 51aad
## Ruqsad lama wareejin karo

1. Ruqsad ama shati si sharci ah lagu siiyey gaadiid kalluumeysi wadani laguma wareejin karo gaadiid kale oo kalluumeysi.
2. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa lagu ganaaxayaa US $ 20-30(labaatan ilaa sodon Doollar).

## Qod. 52aad
## Hakinta ama burinta Ruqsada

Agaasinka Guud wuxuu awood u leeyahay inuu hakiyo ama buriyo ruqsadii la siiyey gaadiidka kalluunka wadaniga ah, haddii ay caddaato in mulkiilaha ama naakhuudaha gaadiidku ku gefay shuruucda iyo nidaamka kalluumeysiga.

## Qod. 53aad
## Khidmadaha

1. Saraakiisha goobaha iyo Agaasinka kalluumeysiga ayaa u xilsaaran qabashada khidmadaha ruqsada kalluumeysiga
2. Khidmada walba waxaa lagu qaadayaa buugaagta xisaabaadka iyo canshuur qabashada dawliga ah.
3. Doon kalluumaysi oo laga dhaafay ruqsad, looma isticmaali karo kalluumaysi haddii aanay dib u qaadan ruqsad kalluumaysi rasmi ah.
4. Ruqsada waxaa la ogolaanayaa marka la bixiyo khidmada, taasoo ah lacag adag.
5. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu canshuur dhaaf 30% ah u sameeyo Gaadiidka kalluumeysi ee ay waxyeeladu soo gaarto ama wax soo saarku ka khasaaro.

## Cutubka 2aad
## Diiwaangelinta gaadiidka kalluumeysiga

## Qod. 54aad
## Diiwaangelinta

1. Wasaaradu waxay bixinaysaa shahaadada diiwaangelinta gaadiidka kalluumeysiga wadaniga ah.
2. Gaadiidna kama kalluumeysan karo biya-baddeedka Puntland haddii aan la diiwangelin.

3. Shahaadada diiwaangelinta waxaa la siin karaa mulkiilaha/kireystaha gaadiidka marka uu soo dalbado, bixiyana khidmadaha ku waajibay.
4. Qaabka shahaadada diiwaangelinta waxaa lagu soo saaratayaa Wareegto Wasiir.
5. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 20 (labaatan Doollar)

## Qod. 55aad
## Lambar siinta gaadiidka diiwaangashan

1. Gaadiid kalluumeysi kasta waxaa la siinayaa lambar, kaasoo lagu muujinayo labada dhinac ee Gaadiidka, iyadoo lagu qorayo midab muuqan kara (Madow ama Caddaan).
2. Lambar kasta wuxuu yeelanayaa cabbir aan ka yarayn 20-sm dherer, 15-sm ballac iyo 10-sm dhumuc.
3. Mulkiile ama wakiil kasta muddo toddobo (7) maalmood gudahood waa inuu lambarka kaga muujiyaa gaadiidka dushiisa.
4. Mulkiilaha ama wakiilka gaadiidka kalluumeysiga waa inay ilaaliyaan tirtirmida iyo qarsoomida lambarka gaadiidka.
6. Lama wareejin karo lambar gaadiid iyo shahaado diiwaangelin haddii aan ogolaansho laga helin Wasaaradda kalluumeysiga.
7. Codsiga lagu doonayo wareejinta lambarka & shahaadada diiwaangelinta waxaa loo soo gudbinayo wasaaradda, waana inay ku cad yihiin arrimaha soo socda;

   B) Magaca, nooca gaadiidka.
   T ) Magaca mulkiilaha, kireystaha iyo kabtanka ama naakhuudaha gaadiidka.
   J ) Markhaatiyadda iyo goobjoogayaasha.
   X) Saxiixa mulkiilaha iyo wareejiyaha

8. Qofkii ama gaadiidkii ka kalluumeysta biya-baddeedka Puntland isagoo aan lahayn ama muuqan lambarka diiwaangelinta waxaa la ganaaxayaa US $ 20 (labaatan Doollar).

# Qaybta 4-aad
# Ruqsadaha & Ogolaanshaha kale

## Cutubka 1aad
## Beerista Kalluunka

## Qod. 56aad
## Ogolaanshaha

1. Qofna ma beeran karo kalluun ama noole biyood kale, haddii uunan haysan ruqsad lagu bixiyey xeerkan.

2. Ogolaansho lama bixin karo haddii Codsaduhu aanu lahayn wax dhul ah ama aag badda agteeda ah oo ku habboon hawlgalada beerista kalluunka.
3. Wasiirku wuxuu bixin karaa ogolaansho kalluun beeris haddii hawshaas aanay keenayn wasakhow ama waxyeellayn kale ee badda ama deegaanka iyo nolosha dadka.
4. Qofkii ku xad-gudba qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 100 (Boqol Doollar)

## Qod. 57aad
## Shuruudaha beerista kalluunka

1. Waqtiga ogolaanshaha beerista kalluunka kama badnaan karo 10 sano, kaasoo shuruudihiisa iyo bixinta khidmada ku waajibtay wasaaraddu hadba dib u eegid ku samayn karto.
2. ilaalinta deegaanka, faafista cudurada iyo tayada noolaha iyo kaabayaasha kalluun beerista.
3. Qofna ma dhoofin karo kalluunka la beero haddii aan ogolaansho la siin.
4. Kaabe walba oo kalluun beeris waxaa ka hawlgelaya Sarkaal la idmay.

## Qod. 58aad
## Ilaalinta kaabayaasha beerista kalluunka

1. Qofna kama kalluumeysan karo kaabayaasha kalluun beerista lagu ogolaaday Qod. 53-aad haddii aan ogolaansho laga helin maamulka kalluun beeristaas.
2. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 10 -- 20 (Toban ilaa labaatan Doollar)

## Qod. 59aad
## Xirista kaabayaasha kalluun beerista

1. Wasaaradu waxay amri kartaa in la xiro ama la joojiyo hawlaha kaabayaasha kalluun beerista haddii lagu xadgudbay shuruudihii lagu ogolaaday.
2. Wasiirka wuxuu ogolaan karaa inay maamulka kaabayaasha kalluun beerista ku saxaan waqti cayiman xaalidihii kallifay xirista ama joojinta hawlaha kalluun beerista.
3. Qofkii fulin waaya amarka xirida ama joojinta hawlaha kalluun beerista waxaa la ganaaxayaa US $ 100 – 200 (Boqol ilaa Laba Boqol oo Doollar)

## Cutubka 2aad
## Kalluumeystaha iyo Ganacsadaha

### Qod. 60aad
### Aqoonsiga Kalluumeystaha

1. Qofna kama kalluumeysan karo biyaha kalluumeysiga Puntland:
    - B) Haddii uunan haysan Shatiga kalluumeystaha;
    - T) Haddii uunan ahayn shaqaale shatiile;iyo
    - J) Haddii uunan u kalluumeysanayn nolol maalmeedkiisa.
2. Codsiga aqoonsiga Kalluumeystaha waxaa loo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasimaha Guud.
3. Aqoonsiga kalluumeystaha waa inuu noqdaa kaar adag, bacaysan, ayna ka muuqdaan sawirka kalluumeytaha, magaciisa, magaca iskaashatada ama shirkada, iyo tirsi lambarka kaarka.
4. Haddii la xaqiiqsado inuu kaarku lumay ama uu waxyeeloobay, waxaa la samaynayaa beddelkiisa.
5. Kaarka kuma shaqaysan karo kalluumeyste kale.
6. Qofkii ku xadgudba qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US$ 20 (Labaatan Doollar)

### Qod. 61aad
### Mamnuucida Shatiga ka ganacsiga Lohodka

Waxaa la mamnuucay bixinta shatiga Lohodka iyo ka ganacsigiisa.

### Qod. 62aad
### Shatiga Kalluumeysiga Fanniga ah

1. Qofna kama qaybgeli karo kalluumeysiga fanniga ah haddii uunan haysan shati.
2. Shatiga waxaa laga codsanayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud ka dib marka la bixiyo khidmadda shatiga.
3. Shatigu wuxuu u ogolaanayaa cayaaryahanka inuu la soo bixi karo kalluun nolol maalmeedkiisa uu u isticmaalo, isagoo adeegsanaya ul, fiilo iyo jilaab keliya.
4. Kalluumeysiga fanniga ah laguma samayn karo goobaha la xirmeeyey, kobcinta, taranka iwm.
5. Qofkii ka hor yimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 100 (Boqol Doollar)

## Qod. 63aad
## Shatiga Farsamaynta Kalluunka

1. Qofna ma farsamayn karo kalluun ama noole biyood kale, si ganacsi ah, haddii uunan qaadan shati.
2. Shatigan ma khuseeyo barafaynta, qalajinta (Qorax & Dab) iyo aqoolidda.
3. Xarun walba oo lagu farsameeyo kalluunka goobta laga dhisayo waxaa astaynaya Wasaarada kalluumeysiga.
4. Warshadaha, Xarumaha Qaboojinta/kaydka, suuqyada iyo kawaanada kalluunka waxaa laga soo saarayaa xeer-hoosaad wasaaradeed.
5. Codsaduhu wuxuu arjigiisa u gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud ka dib marka la bixiyo khidmadda shatiga iyo dalacaadaha kale ee wax soo saarka.
6. Dhaqangalka shatigan waa 12 billood.
7. Qofkii ama shirkadii ka hortimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US$ 500 – 1,000 (Shan Boqol ilaa Kun Doollar).

## Qod. 64aad
## Shatiga ka ganacsiga kalluunka ee gudaha dalka

1. Qofna kama ganacsan karo kalluun haddii uunan haysan shatiga ka-ganacsiga kalluunka.
2. Shatigan ma khuseeyo kalluumeystaha shatiga leh, kalluun beertaha, xubnaha iskaashatooyinka kalluumeysiga, suuqleyda kalluunka shiila iyo danyarta/qaxootiga diiwaangashan.
3. codsaduhu wuxuu arjigiisa u gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud ka dib marka la bixiyo khidmada shatiga.
4. Ganacsaduhu waa inuu haystaa dhammaan qalabka loo adeegsado kalluunka dhinacyada habaynta iyo suuqgeynta.
5. Ganacsaduhu lama wareegi karo kalluun ka hor inta aan kalluunka la geyn goobta dejinta, si loo hubiyo caafimaadkiisa & nadaafadiisa, loona qoro warbixin ku saabsan noocyada, tirada iyo miisaanka kalluunka.
6. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 50 (Konton Doollar).

## Qod. 65aad
## Shatiga gurashada & ka-ganacsiga Bahda Aargoostada

1. Qofna ma guran karo, kamana ganacsan karo bahda aargoostada haddii uunan haysan shatiga gurashada & ka-ganacsiga bahda aargoostada.

2. Shatigan looma adeegsan karo ka ganacsiga aargoostada yaryar ama ugxanta sida iyo tan dhediga ah.
3. Codsiga shatiga waxaa loo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud ka dib marka la bixiyo khidmada shatiga.
4. Wasiirka ayaa wareegto ku soo saaraya xirmeynta goobaha iyo xilliyada aan la guran karin bahda aargostada.
5. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US$ 100 – 200 (Boqol ilaa laba Boqol Doollar).

**Qod. 66-aad**
**Shatiga gurashada & ka-ganacsiga Bacoolaha**

1. Qofna kama ganacsan karo bacoolaha badda haddii aan la siin shatiga gurashada & ka ganacsiga bacoolaha;
2. Shatiga waxaa laga codsanayaa, isla markaana ogolaanaya Agaasimaha Guud ka dib marka la bixiyo khidmada shatiga & ogolaanshaha;
3. Shatigan looma adeesan karo Qolof-badeedda cunnada & hoyga u ah noolaha badda.
4. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxaya US $ 50 ( Konton Doollar).

**Qod. 67-aad**
**Ogolaanshaha Dhoofinta & Soo Dejinta Kalluunka**

1. Qofna ma soo dejin karo, mana dhoofin karo wax soo saarka badda haddii aan la siin ogolaansho sharci ah.
2. Wax soo saar kasta waxaa la mar siinayaa hubinta tayada iyo nadaafadda, waxaana lagu soo baarayaa goobta lagu hayo.
3. Warbixinta sarkaalka hubinta ka dib Agaasimaha Guud ayaa awood u leh ogolaanshaha ama diidmada soo dejinta ama dhoofinta wax soo saarka.
4. Ogolaanshahan ma khuseeyo:
    b) Cilmi baarista
    t) Waxbarashada
    j) Gargaarka degdega ah
5. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 50 – 100 (konton ilaa Boqol Doollar).

**Qod. 68-aad**
**Shatiga Gurashada & Ka-ganacsiga Qajaar-Baddeedka (Cisal baddeedka)**

1. Qofna ma guran karo, kamana ganacsan karo Qajaar-baddeedka haddii uuna qaadan Shatiga Ogolaanshaha gurashada & ka ganacsiga.

2. Codsiga shatiga waxaa loo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud ka dib marka la bixiyo khidmada shatiga & oglaanshaha.
3. Shatigan ma fasaxayo gurashada Qajaar Baddeedka aan qaan-gaarin.
4. Wareegto wasiir ayaa lagu soo saarayaa xirmeynta goobaha iyo waqtiyada aan la guran karin Qajaar baddeedka.
5. Qajaar-baddeed lama dhoofin karo haddii aan marka hore la marsiin habka baarista tayada kalluunka.
6. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $100(Boqol Doollar)

## Qaybta 5-aad
## Arrimaha la adkeeyey ama la mamnuucay

### Cutubka 1aad
### Arrimaha la adkeeyey

### Qod. 69-aad
### Nadaafada kalluunka

1. Kalluun kasta oo laga soo jilaabto biyaha kalluumeysiga Puntland waa in la geeyaa goobta dejinta ee dekedaha, xarumaha kalluumeysiga ama kawaannada.
2. Gaadiidka kalluumeysigu waa inay qaataan tallaagadaha yaryar ee qaboojinta kalluunka marka ay kalluumeysiga u baxayaan.
3. Kalluun walba waa in lagu xareeyaa Qaboojiyaha ka hor inta aan la iib-geyn.
4. Kalluumeyste ama ganacsade ma iib-geyn karo kalluun aan u qalmin inay isticmaalaan dadku.
5. Sarkaalka goobtu wuxuu amri karaa gubidda ama aasidda kalluunka xumaada, khasaarahaas dawladdu ka bixin mayso magdhow.
6. Maqaaxiyaha & suuqleyda kalluunka shiila waa inay kalluunka ku xafidaan Sanduuqyada dhalada ah, lagana ilaaliyo inay wasakhi taabato ama jeermis soo gaaro.
7. Isticmaalka saliidda & dhirta dhadhanka xun ee bedeli kara midabka,urka iyo dhadhanka kalluunka waa mamnuuc.
8. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 20 – 30 (labaatan ilaa sodon Doollar) iyo weliba magdhowga ciddii ku waxyeelowda falkaas.

### Qod. 70-aad
### Hawlgalka Gaadiidka aan wanaagsanayn

1. Gaadiidna ma samayn karo hawlgal kalluumeysi haddii aanay hagaagsanayn xaalada matoorkiisa, dabkiisa & Qolofka.

2. Sarkaalka kormeerka ee goobaha wax soo saarka ayaa u xilsaaran hubinta iyo la socodka hawlgalada gaadiidka kalluumeysiga, kaasoo hakin ama joojin kara gaadiidka haddii uu xaqiiqsado inuusan u qalmin adeegsi.
3. Gaadiidna ma hawlgeli karo haddii uunan qaadan biyo, shidaal, isgaarsiin, jaakada dabbaasha, toosh/nal-bateri iyo raashin.
4. Mulkiilaha ama Maamulaha doonta si ogaansho ah haddii ay u amraan kalluumeysi iyadoo gaadiidku xun yahay, sahay aan la qaadan ama baddu dabaylo/roobab leedahay waxay mas'uul ka noqonayaan dhibaatadii ka dhalata falkaas.
5. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 20 (Labaatan Doollar).

## Qod. 71-aad
## Goobaha tarmidda/kobcinta iyo xilliyada

1. Qofna kama kalluumeysan karo goobaha tarmidda ama kobcinta noole baddeedka Puntland.
2. Qofna kama hawlgeli karo goob la xirmeeyey waqti cayiman.
3. Xayiraadan ma khuseyso hawlaha horumarinta iyo cilmi baarista.
4. Waqtiga & goobta xirmaynta waxaa soo callaamadaynaya saraakiisha kalluumeysiga, waxaana Wareegto ka soo saaraya Wasiirka.
5. Wakhtiyada xirmaynta waxaa lagu soo saarayaa wareegto wasiir.
6. Qofkii ka hor yimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 50 – 100 (Konton ilaa Boqol Doollar).

## Qod. 72-aad
## Samaynta iyo keenista Qalabka & Gaadiidka Kalluumeysiga

1. Qofna ma samayn karo, ganacsi ahaanna uma keeni karo Qalab iyo Gaadiid kalluumeysi ayan ogolaan dalabkiisa iyo naqshadiisa Wasaaradda kalluumeysiga.
2. Ganacsaduhu wuxuu codsigiisa u soo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud, ka dib marka la bixiyo khidmada ogolaanshaha.
3. Agaasinka Guud ayaa siinaya Ganacsadaha naqshada iyo sifooyinka qalabka iyo gaadiidka kalluumeysiga.
4. Qalabka iyo gaadiidka kalluumeysiga waxaa laga soo dejin karaa Dekedaha iyo marsooyinka Puntland oo keliya, si loo hubiyo.
5. Warshadaha iyo xarumaha lagu sameeyo qalabka & gaadiidka kalluumeysiga ee gudaha dalka waxaa si joogta ah u kormeeraya saraakiisha Farsamada.
6. Warshad ama shirkad walba waxaa laga rabaa dammaanad qaad qalabka & gaadiidka ay soo saarto muddo hal sano ah.
7. Qandaraasyada samaynta qalabka & gaadiidka kalluumeysiga waa in la siiyaa shirkadaha wadaniga ah.

8. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 1000 – 2000 (Kun ilaa Laba Kun Doollar).

**Qod.73-aad**
**Callaamadaynta Shabaagaha & Qalabka Kalluumeysiga**

1. Ruqsad walba waa inay tilmaamaysaa qalabka gaadiidka kalluumeysiga wato ama adeegsanayo sida Shabaagaha.

2. Qalab kasta waa inay ka muuqataa callaamad caddaynaysa:

   B) Mulkiilaheeda;
   T) Doonta ay ku diiwaangashan yihiin;
   J) Degmada ama Iskaashatada laga leeyahay.

3. Mulkiiluhu waa inuu hubiyaa in Callaamaduhu muuqdaan.
4. Qofkii waxyeella qalab kalluumasi oo callaamadaysan waxaa laga qaadayaa qiimaha qalabka.

**Cutubka 2-aad**
**Arrimaha la mamnuucay**

**Qod. 74-aad**
**Habka kalluumeysiga mamnuuca ah**

1. Shabaagaha xaalufinta ee Maraakiibta Jariifka jiido waa ka mamnuuc biyaha kalluumeysiga Puntland.
2. Shabaagaha lagu soo wareejiyo aag, cabbirka ishooduna ka yar yahay 50-mm marka si jan-jeer ah loo kala bixiyo waa mamnuuc.
3. Adeegsiga jilaabaha kalluun tarmiyaha (Sumaanta) ee gunta hoose ee badda, loona yaqaan Canqarta waa mamnuuc.
4. Adeegsiga qaraxa, korontada iwm waa mamnuuc.
5. Adeegsiga Haamaha Quusida ee qabsashada bahda aargoostada waa mamnuuc.
6. Wasiirka ayaa xeer-hoosaad faah-faahsan ku soo saaraya habka & qalabka kalluumeysiga ee mamnuuca ah.
7. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 5,000--10,000 (shan kun ilaa toban kun Doollar).

## Qod. 75-aad
## Ugaarsashada Naasleyda Badda & Qubada.

1. Qofna ma dili karo, ceyrsan karo ama waxyeeli karo naasleyda badda iyo qubada.
2. Qofna ma qaadan karo, kamana ganacsan karo naasleyda badda & Qubada xaalad nolol ama dhimasho.
3. Kalluumeysatada iyo bulshada xeebleyda ah waxaa ku waajib ah inay dib u celiyaan Naasleyda badda iyo Qubada ku xanibma biyaha iyo dhulka xeebta.
4. Waxaa la mamnuucay ka ganacsiga ugxanta & qolofta qubada.
5. Lama degi karo, hawlgal kalena lagama fulin karo goobaha tarmida ee naasleyda badda iyo qubada.
6. Haddii si kama ah ay naasleyda badda iyo qubada u galaan shabaagta ama dabin kale waa in sida ugu dhaqsaha badan loo sii daayaa, dibna loogu celiyaa badda.
7. Wasiirka ayaa wareegto ku soo saaraya noocyada naasleyda & qubada ee ilaalinta u baahan.
8. Qofkii ka hor yimaada qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US $ 1,000 – 2,000 (kun ilaa Laba kun Doolar).

## Qod. 76-aad
## Wasakhaynta Biyaha Kalluumeysiga

1. Qofna si bareer ah ama kama' ah uguma shubi karo/dhigi karo shey ama wasakh biyaha kalluumeysiga Puntland, taasoo:
   - B) Waxyeeleysa kheyraadka badda, shimbiraha, deegaanka iyo dadka.
   - T) Carqaladaynaysa kalluumeysiga.
   - J) Khatar gelin karta socdaalka badda.
2. Marka ay dhacdo in shey ama wasakh la dhigo ama lagu shubo badda si kama' ah, waa in Naakhuudaha ama Mas'uulka Gaadiidka si degdeg ah warbixin u soo gaarsiiyaa Wasaaradda Kalluumeysiga, warbixintaasoo xambaarsan macluumaadka:
   - B) Magaca war soo tebiyaha;
   - T) Magaca, baaqa iyo callaamada gaadiidka;
   - J) Nooca sheyga iyo wasakhda;
   - X) Saacada iyo taariikhda
   - Kh) Iyo goobta.

## Qod. 77-aad
## Burburinta Qolof-qareedda

1. Qofna ma guran karo, kamana ganacsan karo Qolof-qareedka cunnada iyo hoyga u ah noolaha badda.

2. Waxaa la mamnuucay adeegsiga biraha goddodka lagaga soo saaro bahda-aargoostada, kuwaasoo waxyeela qarka iyo qolof-qareedka.
3. Waxaa la mamnuucay jilbaha waaweyn ee loo adeegsado kalluunka ku nool gunta hoose ee biyaha kalluumeysiga, kuwaasoo waxyeela qarka & qolof-qareedka.
4. Waxaa la mamnuucay xirfad kasta oo kalluumeysi, taasoo keeni karta burburin qolof-qareedka biyaha kalluumeysiga Puntland.
5. Qoddobkan ma khuseeyo hawlgalada horumarinta ee dib u bacriminta qolof-qareedka, kuwaasoo laga fulinayo goobo ay Wasaaradu callaarnadaysay.
6. Qofkii ku xad-gudba qoddobkan waxaa la ganaaxayaa US$ 5,000 – 10,000 (Shan Kun ilaa Toban kun Doollar)

## Qod. 78-aad
## Waxyeelidda Dhirta ka baxda xeebaha

1. Qofna ma jari karo, kamana ganacsan karo dhirta ka baxda xeebaha, taasoo cunno u ah noolaha badda, isla markaana xeebaha ka ilaalisa dhul go'a ama boholaha iyo ciidda oo fidda.
2. Qofna uma degi karo goobaha dhir xeebeedu ka baxdo si hoy, ganacsi, baaris ama hawlo kale ah haddii aan Wasaarada kalluumeysiga ruqsad laga helin.
3. Wasiirka Wasaarada kalluumeysiga ayaa go'aan kasoo saaraya goobaha loo aqoonsaday deegaan dhireedka.
4. Waxaa la mamnuucay wasakhaynta deegaan xeebeedka oo ay ku jiraan goobaha dhirta, biyo mareennada, goobaha bacriminta iyo tarmida.
5. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa lagu ganaaxayaa US $ 1,000 – 2,000 (Kun ilaa laba kun Doollar).

# Qaybta 6-aad
# Suuqyada Kalluunka

## Cutubka 1-aad
## Dhismaha suuqa kalluunka

## Qod. 79-aad
## Ogolaanshaha

1. Qofna ma samayn karo suuq kalluun haddii aan ogolaansho laga helin Wasaaradda kalluumeysiga.
2. Suuqyada kalluumeysiga dawliga ah waxaa lagu maamulayaa habka ka wada qaybgalka dadka iyo dawladda.
3. Shirkad xirfad u leh habaynta iyo suuqgeynta oo keliya ayaa maamulaysa suuqa.

4. Codsiga waxaa loo gudbinayaa, isla markaana ogolaanaya Xafiiska Agaasinka Guud, ka dib marka la bixiyo khidmada ogolaanshaha.

### Qod. 80-aad
### Callaamadaynta & Naqshada Suuqa

1. Dhismaha suuqa kalluumeysiga waxaa naqshadaynaya, goobtana callaamadayna Saraakiisha kalluumeysiga iyo Dawladaha Hoose.
2. Suuqyadu waxay noqonayaan;-
   B) Suuq dadweyne
   T) Suuq gaar ah.
3. kharashka hawlgalka callaamadaynta & Naqshadaynta waxaa bixinaya codsadaha.

## Cutubka 2-aad
## Nidaamka Suuqa

### Qod. 81-aad
### Tayada Kalluunka

1. Qofna ma keeni karo, mana gadi karo kalluun tayadiisu hooseyso.
2. Kalluunka la keenayo suuqa waa in lagu soo qaado sanduuqyada qaboojinta ama tallaagadaha gawaarida saaran.
3. Kalluunka la keenay suuqa waa in lagu kaydiyaa Qaboojiye fiican.
4. Qalabka lagaga shaqeeynayo Suuqa waa inuu ku habboon yahay shaqada.
5. Suuq walba waa inay ka hawlgalaan shaqaale xirfad leh.
6. Suuq walba waa inuu leeyahay dhuumaha & godka wasakhda.
7. Suuq walba waa inuu leeyahay miisas dhagax ama bir ah.
8. Kalluunka la iibinayo waa inuu mid bacaysan ama qafisan yahay.
9. Waxaa la mamnuucay wasakhda kawaannada hilibka & kalluunka ee lagu shubo dhulka iyo biyaha xeebta.

### Qod. 82-aad
### Mamnuucida Kalluunka aan cunidda ku habboonayn

1. Sarkaalka ilaalinta tayada kalluunka wuxuu mamnuuci karaa kalluunka aan ku habboonayn isticmaalka dadka.
2. Sarkaalku wuxuu joojin ama burin karaa shatiga ama ogolaanshaha haddii maamulka suuqa ay dhawri waayaan shuruudaha suuqa.
3. Qofkii ka horyimaada Qoddobada 79, 80 & 81-aad waxaa la ganaaxayaa US$200 ilaa 400 (Laba ilaa Afar Boqol Doollar).

## Qaybta 7-aad
## Habka La socodka Gaadiidka Kalluumeysiga

### Cutubka 1-aad
### Dejinta nidaamka la socodka

### Qod. 83-aad
### Habka La socodka

1. Wasaarada kalluumeysiga waxay hirgelinaysaa habka ilaalinta doonyaha kalluumeysiga.
2. Habkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan Gaadiidka kalluumeysiga shisheeyaha iyo wadaniga ah ee la siiyey Ruqsada & ogolaanshaha kalluumeysiga biyaha Puntland.
3. Waxaa la hirgeliyey Xarun dhexe oo u xilsaaran ururinta iyo gudbinta warbixinnada.

### Cutubka 2-aad
### Qalabka

### Qod. 84-aad
### Qalabka Isgaarsiinta

1. Gaadiidna hawlgal kalluumeysi uma bixi karo haddii uunan qaadan qalabka isgaarsiinta.
2. Noocyada qalabka isgaarsiinta waxaa lagu soo saarayaa Wareegto Wasiir.
3. Qalabka isgaarsiintu waa inuu furnaadaa waqti walba oo uu gaaddidku ka kalluumeysanayo biyaha Puntland.
4. Haddii ay ku timaado cilad isgaarsiintu, waa in si degdeg ah lagu soo wargeliyaa xarunta dhexe ee la socodka dhaqdhaqaaqa gaadiidka kalluumeysiga.
5. Warbixinada gaadiidka kalluumeysigu waa inay tilmaamaan:
    - B) Callaamada Gaadiidka Kalluumeysiga.
    - T) Goobta kalluumeysiga.
    - J) Waqtiga & Taariikhda.
    - X) Xawaaraha iyo qaabka shaqada.
6. Qofna carqaladeeya, fujiya, demiya ama aan qaadan isgaarsiin waxaa lagu ganaaxayaa US$100 ilaa 200 (Boqol ilaa Laba Boqol Doollar).

# QAYBTA 8-aad
# Shaqaalaha kalluumaysiga

## Cutubka 1-aad
## Kalluumeysatada wadaniga ah

### Qod.85-aad
### Ka hawlgelinta Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha

1. Gaadiid walba oo kalluumeysi ajnabi ah oo loo ogolaaday kalluumeysi gudaha biyaha kalluumeysiga Puntland waxaa laga hawlgelinayaa kalluumeysato wadani ah.
2. Iyadoo la eegayo baaxada gaadiidka kalluumeysiga, Wasiirka ayaa go'aaminaya tirada kalluumeysatada ee ka hawlgeli karta gaadiidkaas.
3. Kalluumeystaha wadaniga wuxuu la xuquuq noqonayaa kalluumeysatada ajnabiga ah.
4. Kalluumeystuhu wuxuu hoyga, cunnada iyo daryeelka caafimaadka ku leeyahay Gaadiidka uu ka shaqaynayo.
5. Kalluumeystaha Wadaniga ah waxaa laga qaadayaa Dekedda, waxaana dib loogu soo celinayaa isla goobtaas.
6. Qofkii ka horyimaada qoddobkan waxaa lagu ganaaxayaa US$ 1,000—2,000 (kun ilaa labo kun Doollar)

## Cutubka 2aad
## Kalluumaysatada shisheeyaha ah

### Qod.86-aad
### Ka shaqaynta gudaha dalka

1. Qofna, Shirkadna ma shaqaalaysan karto kalluumeysato ajnabi ah haddii kalluumeysatada wadaniga ah shaqadaas ay qaban karaan.
2. Shaqaale kalluumeysi ajnabi ah kama hawlgeli karo biyaha iyo gudaha dalka Puntland haddii aan ogolaansho laga helin Wasaarada kalluumeysiga.
3. Shirkadaha kalluumaysigu waxay idaacdaha iyo wargeysyada ka dalbanayaan shaqaalaha ay u baahan yihiin.
4. Haddii dalka gudihiisa laga waayo shaqalaaha ay u baahan yihiin, waxay dalab u dirsan karaan dibada marka ay wasaaraddu ogolaato
5. Shaqaale kasta oo ajnabi ah waxaa loo dalbayaa ogolaansho uu bixinayo Wasiirka ka dib marka la bixiyo khidmada ogolaanshaha.
6. Shaqaale kalluumeysi ajnabi ah waxaa la marsiinayaa nidaamka dal soo gelida ee Dawladda Puntland, baaritaan caafimaad iyo mid dambi geliid.

## Cutubka 2-aad
## Awooddaha Maamulka

### Qod.87-aad
### Xeer hoosaadyada

Xeerkan wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaadyo lagu soo saari doono Wareegto Wasiir, kuwaasoo si gaar ah u faahfaahinaya hawl kalluumeysi gaar ah ama mid la xiriirta khayraadka badda Puntland sida:-

1. Xeer hoosaadka Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha ah.
2. Xeer hoosaadka Gaadiidka Kalluumeysiga Wadaniga ah.
3. Xeer hoosaadka Diiwaangelinta Gaadiidka Kalluumeysiga.
4. Xeer hoosaadka Lohodka.
5. Xeer hoosaadka Bacoolaha.
6. Xeer hoosaadka Naaslayda Badda.
7. Xeer hoosaadka Qubada.
8. Xeer hoosaadka Ilaalinta noolaha dabar go'aya.
9. Xeerka Goobaha Badda ee la dhawro.
10. Xeer hoosaadka Waqtiyeynta Kalluumeysiga.
11. Xeer hoosaadka Aaragoostada.
12. Xeer hoosaadka Qajaar-baddeed.
13. Xeer hoosaadka Suuqyada kalluunka.
14. Xeer hoosaadka Nadaafada Kalluunka.
15. Xeer hoosaadka La socodka Gaadiidka Kalluumeysiga.
16. Xeer hoosaadka dhawrista Dhirta & Qolof-badeeda.
17. Xeer hoosaadka noocyada kalluunka ee laga ganacsan karo.
18. Xeer hoosaadka Warshadaynta & suuqgeynta dibedda ee kalluunka.
19. Xeer hoosaadka dhawrista deegaanka xeebaha.

### Qod.88-aad
### Wakiilasho Shaqo

1. Agaasinka Guud wuxuu u wakiilan karaa Bixinta ruqsadaha & ogolaanshaha kalluumeysiga Gaadiidka wadaniga ah saraakiisha kalluumaysiga ee degmooyinka.
2. Saraakiisha Kalluumeysiga waxay koobiyada ruqsadaha iyo ogolaanshaha ay bixiyeen iyo Caddaymaha Dakhli qabashada waxay keenayaan xarunta Wasaaradda.
3. khidmadaha ka soo xerooday ruqsadaha & ogolaanshaha waxaa lagu xareynayaa Bangiga Dhexe ama faracyadiisa Degmooyinka/Gobolladda.

## Qod.89-aad
## Baaritaannadda

1. Wasaaradu waxay gudaheeda ku samaynaysaa baaritaan bille, saddex billoodle, lix biloodle ama sanadle ah.
2. Wasiirka ayaa awood u leh amrida baaritaanka, si qoraal ah, xafiis iyo goob walba oo shaqadu ka socoto.
3. Wasiirku wuxuu hawsha baaritaanka u xilsaaran karaa sarkaal walba oo Wasaarada ka tirsan, hantidhawrka Guud iyo Aqoonyahano madaxbanaan.
4. Hanti-dhawrka Guud iyo Xisaabiyaha Guud ee Puntland waxay awood u leeyihiin inay baaritaan aan caadi ahayn ku sameeyaan xafiisyada iyo goobaha shaqada ee Wasaaradda.
5. Hay'adaha iyo Ururada Caalami waxay kormeero baaritaan ku samayn karaan goobaha shaqada.

## Qod.90-aad
## Laalid

Waxaa la la laalay xeer kasta oo ka hor imanaya ama aan la socon Karin Xeerkan.

## Qod.91-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiilada Puntland, Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

# Maamulka Guud

## Gaadiidka Kalluumeysigu wuxuu xadgudbe noqonayaa:

B) Haddii lagu sameeyo kalluumeysi ama cilmi-baaris ruqsad la'aan (Qod. 3 & 37);
t) Haddii uunan lahayn Wakiil Diblomaasi iyo Wakiil Wadani ah (Qod. 4 & 8);
j) Hadduu Wareejiyo, lasoo wareego ama been abuurto ruqsad kalluumeysi (Qod. 13);
x) Haddii ruqsada laga waayo gaadiidka dushiisa (Qod. 14);
Kh) Hadduu kalluumeysi dheeri ah sameeyey (Qod. 7);
D) Hadduu qalabkiisa xafidi waayo inta aan la siin ruqsada (Qod.19);
R) Hadduu soo galo soohdinta kalluumeysiga wargelin & ogolaansho la'aan (Qod. 21);
S) Hadduu shixnad kalluun wareejiyo ama la wareego ogolaansho la'aan (Qod.20);
Sh) Haddii uunan marin hubin dekedeed soo gelidiisa iyo bixidiisa (Qod. 22, 23 & 25);
Dh) Haddii uunan muujin calamada; Dalkiisa & Soomaaliya (Qod. 26);
C) Haddii ayan muuqan calaamada; magaca & Lambarka (Qod. 27 & 55);
G) Hadduu isticmaali waayo nalalka bad-mareenimada (Qod.28);
F) Hadduu demiyo raadiyaha ama isgaarsiinta sabab la'aan (Qod.29);
Q) Hadduu uunan isticmaalin fariimaha is-afgaradka ee la siiyey (Qod. 29);
K) Haddii Buuggaagta diiwaangelinta laga waayo dusha gaadiidka (Qod. 31);
L) Hadduu soo diri waayo fariimaha todobaadlaha ee dhaqdhaqaaqa & wax soo saarka (Qod.32);
M) Hadduu waxyeelo gaadiid & qalab kalluumeysi (Qod.34);
N) Hadduu wasakheeyo deegaanka ama qalab kaga tago badda (Qod.35);
W) Hadduu kalluumeysto diiwaangelin la'aan (Qod. 54);
h) Haddii loo adeegsado xirfadaha kalluumeysiga mamnuuca ah (Qod. 71);
X) Hadduu waxyeelo naasleyda badda, Qubada iyo noolaha ku jira badda (Qod.73).

**Qofku wuxuu xadgudbe noqonayaa:**

1. Hadduu aqoonsi ama ruqsad la'aan kalluumeysto (Qod. 60 & 48);
2. Hadduu bedeli waayo ruqsad luntay ama tirtirantay (Qod. 12);
3. Hadduu is-hortaag shaqo ku sameeyo sarkaalka hubinta ruqsada (Qod. 15);
4. Hadduu joojin waayo gaadiidka marka la amro (Qod.30);
5. Hadduu Goob-joogaha siin waayo seexasho & cunno ama uu ilaalin waayo
6. nabadgelyadiisa (Qod. 44 & 45);
7. Hadduu gaadiidka dushiisa ku qori waayo lambarka diiwaangelinta (Qod. 55);
8. Hadduu wareejiyo, lasoo wareego ama been abuurto lambar diiwaangelin (Qod. 55.6);
9. Hadduu kalluun beerto ruqsad la'aan (Qod. 56);
10. Hadduu ka kalluumeysto kaabe kalluun beeris ruqsad la'aan (Qod. 58);

11. Hadduu sababo, qariyo ama wax ka qaban waayo xaalad caafimaad-xumo ama waxyeeleyn deegaan ka dhalata hawlaha kalluun beerista (Qod. 57);
12. Hadduu gurto ama ka ganacsado lohodka, aargoostada, bacoolaha iwm ruqsad & ogolaansho la'aan (Qod. 61, 65, 66 & 68);
13. Hadduu sameeyo kalluumeysiga fanniga ah ruqsad la'aan (Qod. 63);
14. Hadduu farsameey kalluun ruqsad la'aan (Qod. 63);
15. Hadduu dhisto xarun kalluun farsamayn, kawaan ama suuq ogolaansho la'aan (Qod. 63 & 79);
16. Hadduu sameeyo ka-ganacsi kalluun gudaha & dibedda ruqsad la'aan (Qod. 67);
17. Hadduu isticmaalo gaadiid aan hawlgalid u qalmin (Qod. 70);
18. Hadduu ka kalluumeysto goobaha la xirmeeyey (Qod. 72);
19. Hadduu gurto, ka-ganacsado ama burburiyo qolof-qareedka (Qod.75);
20. Hadduu gurto, ka ganacsado ama waxyeelo dhirta xeebaha (Qod. 76);
21. Hadduu keeno qalab & gaadiid kalluumeysi ogolaansho la'aan (Qod. 77);
22. Hadduu suuq geeyo kalluun tayadiisu liidato (Qod. 81);
23. Hadduu ku xad-gudbo kalluumeyste wadani ah (Qod. 85).